## Tusmada Mawduucyada


| | |
|---|---|
| Sookoobidda Qiimeynta Baahiyaha | 1 |
| Sinnaanta Horumarsan | 3 |
| Waxbarasho Dhamaystiran | 6 |
| Ka Qaybgelinta Hawlaha ee Bulshada | 13 |
| Nidaamyada iyo Awoodda La Xoojiyey | 21 |
| Khayraadka iyo Mudnaansiinta Akhris-qoraalka Hore | 26 |
| Ra'yi-celin | 29 |
| Sookoobidda Qorshaha | 30 |
| Xaqiijino | 32 |


## Sookoobidda Qiimeynta Baahiyaha

1. **Fadlan sharraxaad ka bixi hannaanka qiimeynta baahiyaha ee aad ka qaybqaadatay iyo sookoobidda natiijooyinka qiimeyntaas baahiyaha. Fadlan magacaw isbedellada lagu arkay dib-u-eegista xogta heer gobol iyo ta heer deegaan oo muuji khayraadka xogta ee la adeegsaday, oo ay kamid yihiin macluumaadka la xidhiidha CTE ga. Waxa aad sharraxdaa sida qiimeynta baahiyaha iyo xogta heer gobol iyo ta heer deegaan loogu adeegsaday qaadashada go'aanada gaarka ah ee qorshahan iyo miisaaniyaddan.*(500 oo eray ama ka yar) Shardi dheeraad ah haddii codsiga loo xareynayo dugsi gaar ah oo la kafaalo qaaday:* Fadlan ku dar sharraxaad kooban oo ah hannaanka qiimeynta baahiyaha dugsigaaga (dugsiyadaada) gaarka ah iyo sida xogta loogu adeegsaday qaadashada go'aanada gaarka ah ee qorshahooda (qorshayaashooda) iyo miisaaniyaddooda (miisaaniyadahooda). (250 eray oo dheeraad ah ama ka yar)**

Degmadu waxa ay wax ka qabanaysaa dhinnaansho miisaaniyadeed oo $40 malyan ah iyada oo weli joogtaynaysa dedaal sugan oo loogu jiro guusha iyo badqabka ardayga. Iyada oo ay jiraan xannibaado dhaqaale, waxa aanu mudnaanta siinay go'aanada ilaaliya isla markaana xoojiya khibradaha waxbarasho.

Afartii sano ee lasoo dhaafay, waxa aanu kharashaadka dhinnay $67 malyan anaga oo u marayna tallaabooyin bartilmaameedsan, oo istiraatiiji ah—annaga oo yareynayna saameynta soo gaadhaysa fasallada iyo macallimiinta markasta oo ay suuragal tahay. Dhimitaanadani waxa ay muujinayaan awoodda aanu u leenahay gaadhista go'aanada dhaqaale ee adag anaga oo ilaalinayna himiladeena aasaasiga ah ee heersarreynta waxbarasho.

**Hannaanka Qiimeynta Baahiyaha & Khayraadka Xogta:**
Hannaanka qiimeynta baahiyaheenu waxa uu ku salaysnaa himilada ka qaybqaadashada hore waxana uu inta badanna watay inta ugu badan ee daah-furnaan ah ee suuragal ah. Qiimeynta baahiyaha ee qorshahan Hagitaanka Isku-dhafan waxa uu ahaa qayb kamid ah qiimeynta baahiyaha miisaaniyadda degmada ee guud oo ay la socdaan ka qaybqaadashooyin gaar u ah barnaamijyo dheeraad ah. Dedaaladeena waxa loogu talagalay hubinta in dhammaan daneeyeyaasha— macallimiinta, qoysaska, hoggaamiyeyaasha dugsiyada, iyo shuraakooyinka bulshada— ay helaan qaabab ay ku qaataan wadasheekaysigan muhiimka ah. Waxa aanu ogeyn in hal hannaan oo cidkasta loo adeegsado aanu munaasab noqoneyn, markaas waxa aanu abuurnay habab ka qaybqaadasho oo kala duwan si aanu u kordhino galaangal helitaanka una sahalno wadasheekaysi qaabaysan iyo mid dabiici ah. Anaga oo u marayna kulanno dadweyne oo onlayn ah, fadhiyo dhegaysi, xog-ururino toos ah, iyo doodo dugsiyeed, waxa aanu fursado siinay daneeyeyaasha si ay ugaga qaybqaataan qaabab u muuqday kuwo galaangal loo heli karo, macno leh, oo la xidhiidha khibradahooga nololeed.

Waa in aanu dhimitaano miisaaniyadeed oo muhiim ah sameyno sanadkan, markaas hannaankeena ka qaybqaadashada waxa ku jiray wareegyo badan waxana uu mudnaanta siiyey gaadhista dadka saameynta ugu badani kasoo gaadhay dhimitaanadan.  Waxa aanu macallimiinta talooyin kaga helnay kulannada shaqaalaha, waalidiintana isku-imaaddada dadweyne, hoggaamiyeyaasha dugsiyadana wada-tashiyada tooska ah, kuwaas oo dhammaan qaabeeyey fahankeena raadadka dhabta ah ee maalgelinada qorshaha.

Waxa aanu sidoo kale adeegsanay khayraad xog oo heer gobol iyo heer deegaan ah, oo ay kamid yihiin:
- Isbedellada isqorista iyo kala-duwanaanshiyaha xog-tirakoobeedka "demographic" ga ardayda
- Xogta guusha ardayga (qiimeynada gobolka, iReady, MAP, iyo halbeegyada maxalliga ah ee kale)
- Heerarka ka qaybqaadashada CTE iyo xogta is-waafajinta shaqaalaha
- Falanqaynta miisaaniyadda iyo warbixinada kharashaadka
- Qiimeynada saameynta sinnaanta
- Xog-ururinta Dugsiyada Guulaysta ee cabbira cimilada iyo dhaqanka dugsiyada

**Isbedellada Muhiimka ah & Saameynta ay ku leeyihiin Qorshaynta:**
Bulshadeenu aad ayaa ay u caddeysay ahmiyadda joogtaynta taageerooyinka ardayda ee tooska ah. Dugsiyadu waxa ay sidoo kale codsadeen in madax-bannaani dheeraad ah loo siiyo shaqaaleysiinta taas oo ku salaysan baahiyaha gaarka u ah goob kasta. Sidaas awgeed, dugsiyadu waxa ay heleen go'aan-gaadhis iyo dabacsanaan dheeraad ah iyaga oo sidoo kale joogtaynaya tirada shaqaalaha ah iyo maalgelinada daruuriga u ah barnaamijyada aasaasiga ah ee dhammaan dugsiyada. Dhimitaano dheeraad ah ayaa sidoo kale lagu sameeyey shaqaalaha iyo barnaamijyada xafiiska dhexe.

Taas marka laga yimaaddo, isbedellada isdiiwaangelinta CTE waxa ay hagayeen maalgelinada dhabbeyaasha mihnadda ee dalabka-sarreeya si loo xaqiijiyo galaangal helid loo siman yahay oo loo helo fursadaha shaqo.

**Sookoobidda Qiimeynta Baahiyaha Dugsiyada Gaarka ah**
Hannaanka qiimeynta baahiyaha ee dugsiyada gaarka ah waxa uu ku salaysnaa nidaamyada xogtu-hagto ee loogu talagalay in lagu aqoonsado isla markaana wax looga qabto baahiyaha gaarka ah ee ardayda dugsi kasta.  Hannaanku waa habraac socda oo lagu fahmayo baahiyaha ardayda, qoysaska, iyo bulshada dugsi kasta. Dugsiyadu waxa ay xogta ku ururiyeen qaabab badan, oo ay kamid yihiin dabagallo sinnaaneed, xog-ururino dhamaystiran, kooxo diirad-saarid, Wadasheekaysiyo Waalid-Maamul oo bille ah, xogta waxqabadka ardayga, doodaha shaqaalaha iyo guddiga, waraysiyo, iyo ra'yi-celin toos ah oo

laga helo shaqaalaha iyo qoysaska. Hannaankani waxa uu gacan ka geystay in la ogaado halka ardayda, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda bulshooyinka laga tiro badan yahay iyo kuwa la faquuqaa ay uga baahan yihiin taageero dheeraad ah.  Isaga oo sees ka dhiganaya qorshaynta iyo ikhtiyaarada miisaaniyadeed ee gaarka ah ee dugsiga madaxa bannaan ee ku salaysan xogta, dugsi kastaa waxa uu si wax ku ool ah u bartilmaameedsan karaa wax ka qabashooyinka, waxa uu dardargelin karaa xarun ammaan ah, oo loo dhan yahay, waxana uu xaqiijin karaa in dhammaan ardaydu ay u helaan galaangal loo siman yahay khayraadka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan waxbarasho ahaan iyo bulsho ahaan.

Xogta gaarka u ah dugsiga waxa kamid ah:

- The Emerson School: Wadasheekaysiyo Waalid-Maamul ah oo Bille ah, xogta waxqabadka ardayga, iyo ra'yi-celinta shaqaalaha.
- Le Monde French Immersion: Xog-ururin Waalidka iyo Shaqaalaha ah, wadahadallo shaqaalaha iyo guddiga ah, iyo qiimeyno ardayda ah.
- Portland Arthur Academy: Waraysiyo lala yeesho ardayda iyo qoysaska iyo xogta qiimeynta ardayga.
- Portland Village School: Xog-ururinada Shaqaalaha iyo Waalidka, koox diirad-saarid waalid, xogta habdhaqanka iyo qiimeynta.
- The Ivy School: Dabagalka sinnaanta iyo Xog-ururinta waalidka.
- The Cottonwood School: Xog-ururin Qoys iyo World Cafe oo ay ka qaybqaadanayaan ardayda, qoysaska, iyo shaqaaluhu.

## Sinnaanta Horumarsan

1. **Sharrax sida aad aragtidaada ama agabkaaga sinnaanta u dhex gelisay hannaankaaga qorshaynta iyo miisaaniyadda. Soo bandhig hawlaha/xeeladaha ku jira Xaashidaada "Smartsheet kaaga" natiijada/xeeladaha oo sheeg hawlaha gaarka ah ee lagu taageerayo kooxaha ardayda diirad-saaridda ee mudnaanta leh.**

Waxa aanu agabka sinnaanta u adeegsanaa sida qayb muhiim ah ahaan oo kamid ah wareegyadeena horumarinta ee joogtada ah, anaga oo xaqiijinayna in aragtida sinnaaneed ama qaabdhismeedka go'aan-qaadashadu uu hago siyaasadaheena, habraacyadeena, shaqaalaysiinteena, taageerada ardaydeena, qoondeynta khayraadkeena, iyo nidaamyadeena. Markii aanu samaynaynay qorshaheena iyo miisaaniyaddeena, waxa aanu u adeegsanay aragtidan si aanu ugu aqoonsano kooxaha ardayda diirad-saaridda ee saameynta ugu badani kasoo gaadhi doonto go'aanadeena. Si aanu ahmiyadda u siino codkooda, waxa aanu ka qaybgelinay ardaydan kooxo diirad saarid iyo fadhiyo dhegaysi, anaga oo u sahlayna aragtiyahoodu inay qaabeeyaan habraaceena. Tusaale ahaan, PPS waxa ay fadhiyo mudnaansiin u qabatay kooxaha diirad-saaridda ee saameyntu soo gaadhay xilli hore oo hannaanka qorshaynta ah. Fadhiyadan, degmadu waxa ay bixisay macluumaad miisaaniyadeed si ay u taageerto ka qaybqaadasho macno leh. PPS waxa ay kulannadii hore u jirey u adeegsatay inay ardayda iyo xubnaha bulshada ka qaybgeliso fadhiyo mudnaansiin. Fadhiyadu waxa ay diiradda saarayeen awoodaha, daciifnimooyinka, iyo aagagga diirad-saaridda ee degmada.

Xeeladaha iyo hawlaha muhiimka ah ee lagu sheegay hannaankan si loogu taageero kooxaha ardayda ee diirad-saaridda waxa kamid ah: maalgelinno sii socda oo lagu sameeyo kooxaha dan-wadaagta ah ee

ardayda iyo hoggaaminta, mudnaansiinta khayraadka goobta ee dugsiyada iyada oo lagu salaynayo qaaciido sinnaan, iyo siinta dabacsanaan dheeraad ah qoondaynta khayraadka dugsiyeed si loo daboolo baahiyaha gaarka ah ee dugsi kasta.

2. **Waa maxay horumarinta ama tababarka xirfadeed ee muddada laba-sanadoodka ah loo qorsheeyey macallimiinta, shaqaalaha, iyo masuullada si wax looga qabto baahiyaha dhaqan, bulsheed, shucuureed, iyo/ama waxbarasheed ee ardayda, oo ay kamid yihiin ardayda diirad-saaridda?**

PPS weli waxa ka go'an waxbarasho xirfadeed oo la joogteeyey oo waafaqsan mudnaanaheena istiraatiijiyadeed. Muddada laba-sanadoodka, PPS waxa ay sii wadi doontaa maalgelinta horumarinta xirfadeed si ay wax uga qabato baahiyaha dhaqan, bulsheed, shucuureed, iyo waxbarasheed ee dhammaan ardayda, gaar ahaan ardayda diirad-saaridda.

Diirad-saaridda sii socota ee muhiimka ahi waa dhaqangelinta Qaabdhismeedka iyo Khariidad-waddeedka Waxdhigiseed ee PPS ee loo marayo Sinnaanta Waxbarasheed, iyada oo la xaqiijinayo in macallimiintu tababar ka helaan nidaamyo waxdhigis oo caddeyn ku salaysan, oo ixtiraama dhaqannada kala duwan. Tababarka goobta iyo waxbarashada xirfadeed waxa ay waafaqsanaan doonaan xeeladaha waxdhigiseed si loo wanaajiyo natiijooyinka ardayda ee cadaaladda ah. PPS waxa ay sidoo kale sii waddaa xoojinta Nidaamyada Taageerooyinka ee Heerarka-Badan (MTSS) iyada oo ku tababaraysa macallimiinta iyo maamulayaasha wax ka qabashooyinka heerarka leh, qiimeynta guud, iyo la socodka horumarka si loo xaqiijiyo in ardaydu helaan taageero waxbarasheed iyo habdhaqan oo wakhtiga munaasab ku ah, oo bartilmaameedsan.

Taas marka laga yimaaddo, PPS waxa ay qaadatay manhaj Waxbarashada Bulsho Shucuureed ah oo ay adeegsan doonaan macallimiintu inta ay ku gudo jiraan waxdhigista la-talinta/aasaasiga ah "advisory/core instruction". Iyada oo manhajka aasaasiga ah ee la-talinta dugsiga qayb ka ah la-taliyeyaasha dugsiga iyo shaqaalaha bulsheed waxa ay sii wadaan inay tababar ka helaan nidaamyada daryeela uur-ku-taallooyinka iyo taageerooyinka caafimaadka maskaxeed. Degmadu waxa ay sidoo kale sii waddaa inay dhaqangeliso Qorshaha Waxbarashada Farshaxanka Guud, iyada oo la dhexgelinayo khibrado waxbarasho oo halabuur leh oo dhaqan ahaan la jaanqaadaysa ardayda.

Sinnaanta qowmiyadeed weli waa tiir dhexaad, iyada oo la sii wado horumarinta xirfadeed ee ka dhanka ah takoorka isla markaana diiradda saaraysa sinnaanta iyada oo loo marayo diirad-saarid iyo is-dhexgelin qorshaysan oo lagu sameeyo horumarinta xirfadeed. Waxa aanu weli sii wadnaa shuraakooyinkeena RESJ si aanu ugu dardargelino galaangal helid caddaalad ah oo loo helo waxbarashada.

Iyada oo u maraysa maalgelino la joogteeyo oo heerar-badan oo lagu sameeyo aagaggan, PPS waxa ay sameynaysaa wax ka bedello muddo-dheer, oo heer-nidaam ah si ay u xaqiijiso in dhammaan ardaydu helaan waxbarasho la jaanqaadaysa dhaqanka ardayda, oo waxbarasho ahaan adag, shucuur ahaanna taageero leh.

3. **Waa maxay siyaasadaha iyo habraacyada aad dhaqangelisaan si aad u xaqiijisaan in carruurta iyo dhallinyarta dhex mushaaxaya hoy-la'aanta aad ka qaybgelisaan dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha?**

PPS waxa ay dhaqangelisaa siyaasado iyo habraacyo cadcad si ay u xaqiiso in carruurta iyo dhallinyarta wajahaya hoy-la'aanta ay ka qaybgeliso dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha. Kooxda McKinney-Vento waxa ka go'an inay meesha ka saarto caqabadaha oo ay bixiso galaangal loo helo khayraadka muhiimka ah, iyaga oo xaqiijinaya in ardaydu ay helaan fursado waxbarasho oo cadaalad ah.

Si loo ilaaliyo sirta, dhammaan macluumaadka ardayda waxa loo keydiyaa si ammaan ah waxana galaangal u heli kara oo keliya shaqaalaha loo xilsaaray. Shaqaalaha dugsiga iyo kuwa xafiiska dhexe waxa ay qaataan tababarka McKinney-Vento ee sanadlaha ah, kaas oo ay kamid tahay xukunada qarsoodinimada iyo nidaamyada ugu wanaagsan ee lagu taageero ardayda hoy-la'aanta ah. Khayraadka macluumaad ee ku saabsan xuquuqda ardayda waxa si caam ah looga heli karaa xafiisyada dugsiyada.

Kooxda McKinney-Vento waxa ay gaadiid u fudaydiyaan ardayda aan meel sugan ku nooleyn, iyaga oo xaqiijinaya inay soo xaadiri karaan hawlaha dugsiga iyo kuwa ka baxsan dugsiga. Caqabadaha isdiiwaangeilnta waxa wax looga qabtaa iyada oo meesha laga saarayo shardiga ah caddeynta cinwaan rasmi ah. Taas marka laga yimaaddo, ardaydu waxa ay helaan taageero waxbarasho, oo ay kamid yihiin caawin waxbarasheed iyo la-talin, si loo khafiifiyo saameynadii ay keeneen kala go'istii ay keentay sugnaansho la'aanta guriyeed. Kooxdu waxa ay sidoo kale xaqiijiyaan ka qaybqaadashada isboortiga, naadiyada, iyo barnaamijyada dugsiga-kadib ee dugsiga iyaga oo kaalmo ka geysanaya fiiga, dirayska, iyo maareynta gaadiidka iyo jadwallada munaasabbadda.

Xafiisyada Adeegyada Taageerada Ardayda iyo Barnaamijyada La Maalgeliyey waxa ay iska kaashadaan sidii ay u bixin lahaayeen taageero la khaasyeelay isla markaana ay meesha uga saari lahaayeen caqabadaha ku gadaaman guusha. Kooxda McKinney-Vento waxa ay la socdaan xogta ardayga, waxa ay bixiyaan hagitaan, waxana ay si dhaw ula shaqeeyaan shaqaalaha dugsiga si ay u xaqiijiyaan in adeegyadu yihiin kuwo la khaasyeelay. Dugsiyadu waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan dardargelinta bay'ado loo dhan yahay halkaas oo ardaydu ku dareemaan taageero iyo ceebayn la'aan.

Iyaga oo u maraya tallaabooyinkan kusii-talagal "proactive measures", PPS waxa ay dammaanad qaadaan in ardayda wajahaya hoy-la'aantu ay si buuxda uga qaybqaadan karaan dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha waxbarasheed, iyaga oo dardargelinaya badqabkooda waxbarasheed, bulsheed, iyo shucuureed.

4. **Sharrax wixii dedaallo ah ee lagu xaqiijinayo in dhammaan ardaydu ay fursad u helaan ka qaybqaadashada barnaamijyada CTE ee guud ahaan loo arko inay yihiin kuwo labka ama dheddigu u badan yihiin.**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ka go'an ballaadhinta galaangal u helitaanka barnaamijyada Waxbarashada Mihnadeed iyo Farsameed (CTE), iyaga oo xaqiijinaya in dhammaan ardaydu ay fursado u helaan aagagga hore ay ugu badnaan jireen hal jinsi. Waxa aanu tijaabinaynaa barnaamijka YouScience ee Benson iyo McDaniel si aanu uga caawino ardayda inay aqoonsadaan dhabbooyinka mihnadeed iyaga oo ku salaynaya awoodahooda dabiiciga ah, anaga oo ballaadhinayna ku baraarugsanaantooda fursadaha ka baxsan caadooyinka jinsiyeed ee soo jireenka ah. Taas marka laga yimaaddo, waxa aanu horumarinaynaa khibrado waxbarasho oo bartilmaameedsan oo mihnad-la-xidhiidha oo aanu kaga taageerayno ardayda kasoo jeeda bulshooyinka laga tirada badan yahay sahaminta shaqooyinka mushaharka-badan, ee dalabka-sarreeya. Dedaalladan waxa kamid ah shuraakooyinka istiraatiijiyadeed ee aanu la leenahay hay'adaha sida Oregon Tradeswomen, Inc., taas oo siisa hagitaan iyo fursado waxbarasho camali ah haweenka dhallinyarta ah ee daneynaya xirfadaha farsamada gacanta.

Nidaamkeena Isku-xidhan ee Dhabbaha "Pathway Ecosystem Model" waxa uu xaqiijiyaa in dhabbo mihnadeed oo kasta ay taageerto warshad, bulsho, iyo shuraakooyin dugsiga-kadib ah, taas oo u abuuraysa galaangal helid la joogteeyo dhammaan ardayda. Maalgelinta tallaabada 98 "Measure 98 funding" ayaa lagu taageeraa shaqadan iyada oo la ballaadhinayo barnaamijyada CTE iyo fursadaha waxbarashada ee ku salaysan shaqada. Waxa aanu sidoo kale aqoonsanahay in galaangal heliddu ku bilaabato taageero heer-dugsi ah. Si aanu taas u xaqiijino, waxa aanu si dhaw uga la shaqaynaynaa la taliyeyaasha iyo masuullada jadwalka ee khubarada ah tirtiridda caqabadaha iyo kordhinta isdiiiwaangelinta barnaamijyada CTE ee dhammaan kooxaha ardayda.  Iyada oo u maraysa hindiseyaashan, PPS waxa ay dardargelinaysaa nidaam CTE oo si ka badan sidii hore loogu dhan yahay, iyada oo awoodsiinaysa ardayda inay raadsadaan mihnado ku salaysan awoodahooda ee aan ku salaysneyn aragtiyo hore oo khaldan.

## Waxbarasho Dhamaystiran

1. **Sharrax wixii isbeddelo ama cusbooneysiin ah ee aad ku samaysay dib u eegista barnaamijkaaga iyada oo lagu salaynayo Agabka Dib U Eegista Barnaamijka iyo Qaabdhismeedka Akhris-qoraalka Hore ee Oregon. Tusaale ahaan, miyaa talooyinkoodu qaabeyn doonaan dhaqangelinta hawlaha gaarka u ah barnaamijka mise waxkale? Shardi dheeraad ah haddii codsiga loo xareynayo dugsi madax bannaan oo la kafaale qaado: Fadlan ku dar wixii cusbooneysiino ah ee dugsiyada madaxa bannaan.**

Ka hay'ad iskaashiyeed ahaan, Guddiga La-talinta Akhris-qoraalka Hore ee PPS—oo ay kamid yihiin xubnaha bulshada, qoysaska, macallimiinta, iyo maamuleyaasha—ayaa dib u eega xogta dhaqangelinta isla markaana qiimeeya horumarka. Guddiga La-talintu waxa ay dhamaystireen Agabka La-talinta Barnaamijka intii lagu gudo jiray kulanadii billaha ahaa ee laga soo bilaabo Oktoobar, 2024 illaa Janaayo 13, 2025. Markii ay taariikhdu ahayd Maarso 3, 2025, guddigu waxa ay wadaageen talooyinkooda. Markii ay taariikhdu ahayd Maarso 17, 2025, PPS waxa ay guddiga la wadaagtay qodobada deeqda akhris-qoraalka iyo go'aanada miisaaniyadda. Abriil iyo Maajo, Guddiga La-talintu waxa ay si dheeraad ah u sii qiimeyn doonaan oo uga wada hadli doonaan macluumaadkan si ay u diyaariyaan talooyin barnaamij oo loogu talagalay laba-sanadoodka xiga. Natiijooyinka kasoo baxay Agabka Dib U Eegista Barnaamijka, oo uu weheliyo Qaabdhismeedka Akhris-qoraalka Hore ee Oregon, ayaa gacan ka geysan doona qaabaynta talooyinkan si loo xaqiijiyo inay waafaqsan yihiin nidaamyada ugu wanaagsan ee waxdhigista akhris-qoraalka hore.

Guddiga La-talinta waxa kamid ah xubnaha bulshada, qoysaska, macallimiinta, iyo maamuleyaasha kuwaas oo si wadajir ah dib ugu eega isla markaana ra'yi-celin uga bixiya xogta dhaqangelinta iyo horumarka. Doorkooda ka wada hadalka isbeddelada, soo jeedinta talooyinka, iyo u doodista akhris-qoraalka hore waxa uu gacan ka geysan doonaa go'aaminta wixii isbedello ah ee daruuri ah ee ay tahay in lagu sameeyo hawlaha barnaamijka gaarka u ah, fursadaha horumarinta xirfadeed, ama qoondeynta khayraadka.

Iyada oo la isku darayo aragtiyaha laga helo Agabka Dib U Eegista Barnaamijka iyo Qaabdhismeedka Akhris-qoraalka Hore ee Oregon labadaba, guddigu waxa ay xaqiijin doontaa in barnaamijku sii wado in uu dhallinyarada barteyaasha ah si wax ku ool ah u taageero isaga oo la jaanqaadaya baahiyaha bulshada iyo yoolasha akhris-qoraalka ee gobolka.

**Fadlan ku dar wixii cusboonaysiino ah ee dugsiyada madaxa bannaan:**

Dugsi madax bannaan oo kastaa waxa uu samaystay qorshihiisa iyo barnaamijkiisa gaarka ah ee uu ku dhaqangelinayo Deeqda Degmo Dugsiyeedka ee Guusha Akhris-qoraalka Hore. Iyaga oo ku salaynaya ra'yi-celinta laga helay macallimiinta, maamuleyaasha, iyo xubnaha bulshada; oo ay weheliyaan dib u eegista xogta iyo horumarka barnaamijyadooda, dugsiyada madaxa bannaan waxa ay gaadheen go'aano la xidhiidha cusboonaysiinta ay ku samaynayaan qorsheyaashooda akhris-qoraalka hore ee 2025-2027. Inkasta oo inta ugu badan dib u eegista iyo qiimeynta dugsiyada madaxa bannaan ay ku samaynayaan dhaqangelintooda nidaamyada ee lagu sharxay Qaabdhismeedka Akhris-qoraalka Hore ee Oregon ay weli sidoodii ahaan doonaan, haddana dugsiyada qaar ayaa dib u qiimeyn doona manhajka xirfadaha aasaasiga ah iyo fursadaha horumarinta xirfadeed ee macallimiinta. Guud ahaan, dugsiyada madaxa bannaan waxa ay xaqiijin doonaan in qorsheyaashooda iyo barnaamijyadoodu ay sii wadi doonaan inay barteyaasha dhallinyarta ah u taageeri doonaan si wax ku ool ah iyaga oo la jaanqaadaya baahiyaha bulshada iyo yoolasha akhris-qoraalka ee gobolka.

2. **Dhamaystir Xaashida "Smartsheet ka" Sharraxaadaha Adeegsiyada La Ogol Yahay ee Akhris-qoraalka Hore oo ka kooban horumarinta xirfadeed, tababarka, kaabis waxbarasho oo heer-saraysa, iyo waxbarasho la kordhiyey. *Wax jawaab sharraxaad ah looma baahna.***

Eeg lifaaqyada codsiga ee xaashiyaha Adeegsiyada La Ogol Yahay ee Akhris-qoraalka Hore ee degmada iyo dugsiyada madaxa bannaan.

3. **Sidee baad u xaqiijisaa in naqshadda manhajka iyo manhajka la qaatay ee dhammaan aagagga maadooyinka (udub-dhexaad ama aasaasi iyo kab) ay ka kooban yihiin baaxad iyo isku xigxigitaan ujeedooyin waxbarasheed oo K-12 ah oo si cad loo tibaaxay oo isla markaana ay waafaqsan yihiin dhammaan heerarka gobol iyo qaran?**

Hannaankeena qaadashada manhajku waa mid adag, loo dhan yahay, oo waafaqsan manhajyada ay qaadatay ODE, himiladeena, iyo xeeladaheena aanu mudnaanta siino. Hannaankeenu waxa uu ku bilaabmaa baaxad iyo isku xigxigitaan ku salaysan heerarka gobol iyo qaran. Dhammaan manhajyadeenu waa kuwo waafaqsan heerarka. Hogaannada maadooyinka ee Xafiiska Dhexe ee PPS ayaa isku keena guddi qaadasho oo ka kooban macallimiin, maamuleyaal dugsiyeed, iyo khubaro.

Iyaga oo adeegsanaya nidaamyada ugu wanaagsan ee waxbarashada, xubnaha guddigu waxa ay sameeyaan agab-qiimeyn oo ay ku qiimeeyaan khayraadka waxdhigiseed. Agabka-qiimeyneed waxa uu yeelan karaa qaabab kala duwan, balse waxa uu marwalba ka koobnaan doonaa heerarka gobol iyo federaal iyo shuruudaha sinnaanta qowmiyadeed iyo la jaanqaadista dhaqan. Waxa aanu agabkeena-qiimeyneed ku dabbaqnaa manhajyada ay qaadatay ODE waxana aanu aqoonsanaa ikhtiyaarada buuxiya shuruudaheena; kadibna waxa aanu liiskan garab dhignaa EdReports si aanu u doorano manhajyada ugu qiimeynta sarreeya. Xaaladaha qaar, waxa dhici karta in manhajyadu aanay buuxin baahiyaha/heerarka PPS. Marka ay tani dhacdo, waxa aanu raadsanaa hannaan qaadasho oo madax bannaan oo ku salaysan hagitaanada ODE. Hannaankaas madaxa bannaan waxa uu adeegsan doonaa isla agab-qiimeyn si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta heerarka iyo qiyamka labadaba.

Ikhtiyaarada manhajeed kadib waa lasoo koobaa iyada oo lagu salaynayo agabka-qiimeynta, dib u eegista khayraadka, iyo waraysiyada kadib tijaabada goobta. Inta lagu gudo jiro tijaabada goobta, ardayda, xubnaha bulshada, iyo qoysaska ayaa lagu casuumaa inay dib u eegaan oo qiimeeyaan khayraadka iyaga oo u maraya munaasabado iyo bandhigitaano bulsheed.

Manhajyada kabka ah ayaa dib loo eegayaa kadib marka aanu qaadano manhajyada aasaasiga ah. Tani waxa ay xaqiijisaa in khayraadka kabka ahi ay taageeraan manhajyada cusub. Khayraadka kabka ah waxa dib u eegis loogu sameeyaa isla hannaanka loogu sameeyo khayraadka aasaasiga ah.

4. **Sharrax nidaamkaaga xaqiijinta in waxdhigista fasalku ay noqoto mid dhamaystiran, qorshaysan, soo jiidasho leh, oo carisa dhammaan ardayda.**

Waxbarashada dhamayska tirani waxa ay ku bilaabataa himilo. Himiladeenu waa in ay qallinjebiyaan arday naxariis leh, oo qaab naqdin leh u fekera oo awood u leh inay iskaashi sameeyaan, xalliyaan mashaakilka, oo hoggaamiyaan duni bulsho ahaan ka caddaalad badan sidii hore. Si aanu u gaadhno yoolkaas, hannaanadeenu waa kuwo ahmiyadda siiya ardayda oo daryeela uur-ku-taallooyinka, waxana ay khayraadkeena waxbarasheed dardargeliyaan wax-is-weydiinta, sahaminta, iyo qaab fekerka naqdinta leh.

Marka ardaydu koraan, waxa aanu ka doonnaa inay qaadaan masuuliyadda waxbarashadooda oo ay bilaabaan inay xidhiidho la sameeyaan dugsiyadooda iyo bulshooyinkooda. Waxa aanu bartilmaameedsanaa abuurista bay'ado waxbarasheed oo loo dhan yahay, ka qaybqaadasho leh, dhiirrigelin leh, oo togan. Tani waxa ay ka bilaabataa barteyaasheena ugu da'da yar. Ardayda rawdada kahor "PreK" wax baa ay akhriyaan, waa ay hadlaan, xallin-mashaakil ayaa ay sameeyaan, wax baa ay abuuraan, waana ay ciyaaraan maalinkasta. Waxa aanu nidaamyada waxdhigiseed waafajinaa Qiyamkeena Aasaasiga ah ee Barteyaasha Hore ee PPS, taas oo u dhaxaysa rawdada kahor "PreK" iyo fasalka labaad.  Fasalladeena dugsiga hoose, shuruudaheena aasaasiga ahi waxa ay xaqiijiyaan in arday waliba uu fursad maalinle ah u helo ka qaybqaadashada dhammaan maadooyinka aasaasiga ah, uu xarakaad sameeyo oo ciyaaro, oo uu yeesho xirfadaha bulsheed ee muhiimka ah.

Khibradaha waxbarashada ee dhamayska tirani waxoogaa waa ay ka duwan yihiin fasallada lixaad illaa labiyo tobnaad. Manhajyadeena aasaasiga ah ee cusub waa kuwo heer-fasal ah oo waafaqsan-heerarka, balse ardaydu sidoo kale waxa ay galaangal u helaan ikhtiyaaro badan oo kala duwan. Kuwan waxa kamid ah Luuqadaha Caalamka, AVID, Caafimaadka, Jimicsiga, iyo dhabbooyin farshaxan oo kala duwan sida lagu xusay Qorshaheena Waxbarashada Farshaxan ee Muhiimka ah.

Waxa sidoo kale si qoto dheer nooga go'an laba-luuqadlenimada. Ku dhawaad kala badh kamid ah 81 keena dugsi hadda waxa ay marti geliyaan barnaamijka isdhexgelinta laba luuqadood oo mid kamid ah shan luuqadood ah: Fiitnaamiis, Raashiyaan, Jayniis, Isbaanish, iyo Jabaaniis. Sanad kasta arday qallinjebiyeyaal PPS ah oo dheeraad ah ayaa kasbada Shaambadda Laba-luuqadlenimada "Seal of Biliteracy" - oo ah korodh saddex laab ah tan iyo 2019 kii.

5. **Sidee baad u xaqiijisaa in ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshadu ay helaan bay'ad waxbarsho oo ammaan ah oo soo dhaweyn leh, oo ay kamid yihiin balse aan ku xaddidneyn ka madhnaanshaha maandooriyaha, budhcadda, xadgudubka?**

Xaqiijinta bay'ad waxbarasheed oo ammaan ah oo soo dhaweyn leh waa arrin mudnaan u ah PPS. Dugsi kastaa waxa uu dhex geliyaa xeeladaha ammaanka iyo u dhannaanshaha yoolashiisa Ikhtiyaarka & Horumarinta Dugsiga (SCIP), oo ay hagaan goleyaasha goobta dugsiyada ee ay ku jiraan xubnaha bulshadu. Xog-ururinada bulsheed ee joogtada ah waxa ay gacan ka geystaan qaabeynta yoolashan si qaab wax ku ool ah wax looga qabto walaacyada ammaanka.

Si loo dardargeliyo u dhannaanshaha, dhammaan isgaadhsiinta heer degmo waxa loo turjumaa lixdeena luuqadood ee inta ugu badan lagu hadlo, iyada oo dugsiyadu bixinayaan turjumaado dugsiyeed oo dheeraad ah oo ku salaysan baahiyaha luuqadeed ee bulshooyinkooda. Inta lagu gudo jiro musiibooyinka, waxa aanu xusuusinaa qoysaska hababka warbixinta ee aan haybta lagu aqoonsan iyo adeegyada taageerada ee la heli karo.

Waxa aanu leenahay shuraakooyin bulsheed oo RESJ ah oo gaar u ah dhaqan oo ardayda iyo qoysaska ka taageera u doodista, ammaanka iyo dareenka ka mid ahaanshaha. Dugsiyadeena SUN waxa ay qoysaska ka taageeraan galaangal helidda waxbarashadooda. Waaxda RESJ sidoo kale waxa ay shaqaalaha tababaro ka siisaa joojinta nacaybka iyo eexda oo ay la socoto kaga jawaabidda walaacyada jewiga dugsiyeed tababar, taageero iyo horumarin xirfadeed oo la khaasyeelay.

Tan iyo 2022 kii, Kooxda Kahortagga iyo Ka Jawaabidda Xadgudubka Dhallinyarta ee PPS waxa ay taageerayeen ardayda loo aqoonsaday inay halis sare ugu jiraan ahaanshaha dhibbaneyaal ama xadgudub oogeyaal bulshada dhexdeeda ah.  Kooxdu waxa ay qabtaan munaasabado ka dhaca dugsiyada sare oo qayb ka ah barnaamijkooda dhamayska tiran si ay ardayda ugu xidhaan khayraadka iyo adeegyada. Falgallada ardayda ee maalinlaha ah waxa la dhexgeliyaa qaabdhismeeddada taageerada ee dugsiga si loo xaqiijiyo xarumaha dugsiyadu inay ka madhan yihiin daroogooyin, budhcad, iyo xadgudub, iyada oo la dardargelinayo bay'ad waxbarasho oo ammaan ah oo taageero leh oo cidwaliba hesho.

6. **Sidee baad u xaqiijisaan ardaydu inay galaangal u helaan barnaamijyo maktabad dugsiyeed oo xooggan?**

Dugsi kasta oo hoose waxa uu leeyahay maktabad uu shaqaale ka yahay khabiir khayraadka maktabadda ah oo shahaado haysta. Waxa aanu shardi ka dhignaa in dhammaan ardayda dugsiyada hoose ay ugu yaraan hal xiisad kobcin ah ka qaataan khabiirka toddobaad kasta. Booqashooyinka maktabaduhu waxa laga yaabaa inay diiradda saaraan ka qaybqaadashada akhriska, ama casharro ay hagaan Heerarka Maktabadaha Dugsiyada Oregon. Khubarada waxa sidoo kale lagu tababaray manhajkeena Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida ee cusub si ay u kaabi karaan oo ay u taageeri karaan mawduucyada aqoon-dhisidda ah ee ardaydu ku bartaan fasalladooda aasaasiga ah.

Hagaha Barnaamijka Aasaasiga ah ee PPS waxa uu tibaaxaa shuruudaha shaqaalaha ee maktabadaha, oo uu kamid yahay FTE 0.5 ah ugu yaraan dugsiyada dhexe ee dhamayska tiran. Inkasta oo barnaamijyada maktabaduhu kala duwan yihiin, haddana waxa ay bartilmaameedsadaan inay ku ilhaamiyaan ardayda inay noqdaan akhristeyaal inta ay nool yihiinba ah, waxa ay ardayda baraan Heerarka Maktabadaha Dugsiyada Oregon ee galaangal helidda iyo adeegsiga macluumaadka, waxana ay taageeraan macallimiinta maaddooyinka aasaasiga ah. Maktabadaheena fasallada dugsiyada dhexe waxa ay u adeegaan baahiyaha horumarineed ee gaarka ah ee ardayda fasallada dugsiyada dhexe iyaga oo bixinaya galaangal heild muddaysan iyo mid wakhti aan ku xaddidneyn.

Dhammaan maktabadaha dugsiyada sare ee PPS waxa ay leeyihiin khabiir labada-gellin shaqeeya kaas oo bixiya barnaamijyo diiradda saaraya baahiyaha iyo danaynta macluumaadka ardayda ee madaxa bannaan, adeegsiga wax ku oolka ah ee akhlaaqeed ee macluumaadka, iyo iskaashi lala sameeyo macallimiinta fasallada. Maktabadaheena dugsiyada sare waa goobo shaqooyin badan halkaas oo ardaydu ay sidoo kale si madax bannaan ama kooxo kookooban ugu shaqayn karaan.

Anaga oo waafajinayna himiladeena iyo qorshaheena, waxa aanu dhignaa khayraad kala duwan dhammaan maktabadaheena kuwaas oo qadariya aqoonsiyada dhaqan iyo khibradaha nololeed ee kala duwan. Maadaama oo ay baahi noo hayso isla markaana aanu haysano taageerooyinka aanu ku soo iibsanayno khayraad cusub, waxa aanu doonaynaa ballaadhinta taageerooyinkan.

7. **Sidee baad ula socotaan wax ku oolnimada wax ka qabashooyinka loogu talagalay ardayda wajahaysa qulubka, walaaca, culayska-nafsiyeed, iyo caqadabaha is-xakameyn-la'aanta?**

PPS waxa ay si firfircoon ula socotaa wax ku oolnimada wax ka qabashooyinka loogu talagalay ardayda wajahaysa qulubka, walaaca, culayska-nafsiyeed, iyo is-xakameyn-la'aanta iyada oo u maraysa nidaam taageero oo ay xogi-hagto, oo heerar-badan (MTSS). Shaqadani waxa ay ugu horreyn ka dhacdaa kooxaha Wax Ka Qabashada Ardayda ee Heerka 2 ee dugsi kasta halkaas oo lagu la socdo saxnaanshaha iyo wax ku oolnimada wax ka qabashada ardayda u baahan taageerada. Taas marka laga yimaaddo, Bixiyeyaasha Adeegyada Ardayda PPS, La-taliyeyaasha Dugsiyada, Shaqaalaha Bulsheed ee Dugsiyada, iyo Cilminafsi-yaqaanada Dugsiyada, iyo sidoo kale daaweeyeyaasha caafimaadka maskaxda ee dugsiyeed ee heshiiska lagu la jiro, ayaa lagu tababaraa inay qoraallo kiis oo faahfaahsan ka haystaan siintooda adeegyada gaarka ah ardayda. Wax ka qabashooyinka iyo waxdhigista sida gaarka ah loogu naqshadeeyey ardayda leh Qorsheyaal Waxbarasho oo La Khaasyeelay (IEP) ayaa waxa kormeera maareeyeyaasha kiisaska IEP ga saddexdii biloodba mar si ay u cabbiraan horumarka habboon ee laga sameeyey yoolasha IEP ga.

Qorshaha Shaqada Xaadiritaanka ee MTSS waxa uu isdhexgeliyaa go'aan-qaadashada xogta ku salaysan si loo qiimeeyo wax ka qabashooyinka. Anaga oo u marayna kooxo dugsiyeed sida ASERT, waxa aanu qiimeynaa saameynta xeeladaha taageerada waxana aanu wax ka beddel ugu sameynaa habraacyada hadba sida loogu baahdo. Diiraddeenu waxa ay saaran tahay aqoonsiga wax ka qabashooyinka wax ku oolka ah ee horumariya ka qaybqaadashada iyo badqabka ardayga.

Si wax looga qabto maqnaanshiyaha dabadheeraada—ee badanaa la xidhiidha caqabadaha caafimaadka maskaxeed—MTSS waxa ay samaynaysaa kooxo diirad-saarid oo daaha ka roga sababaha aasaasiga ah. Hannaankan, oo kaashanaya Panorama iyo xogta qaranka ee Xog-ururinta Dugsiyada Guulaysta, ayaa gacan ka geysta qaabaynta xeeladaha bartilmaameedsan, ee caddeynta ku salaysan ee taageera baahiyaha shucuureed iyo habdhaqan ee ardayda.

Taas marka laga yimaaddo, xog-ururinada PPS waxa ay aragtiyo wakhtiga-dhabta ah ka bixiyaan badqabka ardayda, taas oo noo saamaxaysa inaanu kormeerno isbeddelada, cabbirno wax ku oolnimada wax ka qabashooyinka, isla markaana aanu wanaajino hannaankeena. Anaga oo si joogto ah u falanqaynayna xogta, waxa aanu xaqiijinaa in wax ka qabashooyinkeenu ay dardargeliyaan adkaysiga, xakameynta shucuureed, iyo guusha waxbarasheed.

Iyada oo u maraysa dedaaladan, PPS waxa ay joogtaysaa dedaalka ay ugu jirto abuuridda bay'ad taageero iyo gargaar leh oo daboosha baahiyaha dhammaan ardayda.

8. **Sidee baad u aqoonsataan oo taageero uga bixisaan baahiyaha waxbrasheed ee ardayda aan dabooleyn ama dhaafaysa heerarka gobol iyo qaran ee kooxaha ardayda ee diirad-saaridda? Waa kuwee nidaamyada idiinku diyaarsan taageeridda baahiyaha waxbarasheed ee ardayda, oo ay kamid yihiin kuwa loogu talagalay kooxaha ardayda diirad-saaridda, kuwaas oo**

**dhaafsiisan heerarka gobol iyo qaran?**

Waxa naga go'an dedejinta waxbarashada dhammaan ardayda anaga oo sidoo kale xidhayna gaababka guusha ee joogtada ah, ee aan la aqbali karin ee u dhexeeya Ardayda Caddaanka ah iyo Ardayda aan Caddaanka ahayn. Kooxdeena Cilmibaadhista iyo Qiimeyntu waxa ay kala shaqeeyaan macallimiinteena, shaqaalaheena dugsiyeed, hoggaamiyeyaasha dugsiyeed, iyo Xafiiska Adeegyada Taageerada Ardayda sidii ay si joogto ah dib ugu qiimeyn lahaayeen sida aanu u aqoonsano ee taageero uga bixino baahiyaha ardayda.

PPS waxa ay bixisaa nidaamyo taageero oo heerar-badan (MTSS) iyo taageero waxdhigiseed oo is daba joog ah. MTSS waxa ay diiradda saartaa ilmaha dhammaantii, iyada oo taageero ka bixinaysa waxbarashada akaadeemiyadeed isla markaana wax ka qabanaysa baahiyaha habdhaqan, bulsho-shucuureed, iyo xaadiritaanka. Waxa aanu aqoonsanaa nidaamyo waxdhigis, wax ka qabasho, iyo qiimeyn caddaalad ah, oo caddeyn ku salaysan oo aanu ku xaqiijinayno in arday waliba helo taageerada uu u baahan yahay. Si aanu taas u gaadhno, qiimeynteena dhamayska tiran waxa kamid ah qiimeynta guud, qiimeynta faahfaahsan, qiimeynta waxbarashada dhexdeeda ee caamka ah, qiimeynta halbeegeed, iyo cabbiraadaha dhammaadka waxbarashada.

Qaabdhismeedka MTSS dhexdiisa, PPS waxa ay wakhti u qoondaysaaa bulshooyinka waxbarashada xirfadeed. Kuwani si joogto ah ayaa ay u kulmaan si ay isaga kaashadaan waxdhigisita heerarka ku salaysan, qiimeynta caamka ah, horumarka waxbarashada, iyo jawaabta kasoo noqotay waxbarashada. Iyaga oo u maraya bulshooyinkan, macallimiintu waxa ay si iskaashi leh u qorsheeyaan sidii ay sida ugu wanaagsan ugu dabooli lahaayeen baahiyaha ardayda. Shaqadan waxa kamid ah adeegsiga Afarta Su'aalood ee DuFour si loo ballaadhiyo waxbarashada ardayda horumarsan.

PPS waxa ay taageertaa ardayda dhaafsiisan heerarka iyada oo u maraysa Waaxda TAG, oo iskaashi kala samaynaysa waaxo badan sidii loo aqoonsan lahaa ardayda hibada leh, oo ay kamid yihiin kooxaha kasoo jeeda bulshooyinka laga tirada badan yahay. Adeegyada TAG waxa ay bixiyaan khayraad, tababar, iyo qorsheyaal TAG oo gaar ah oo lagu taageerayo kala duwanaanshaha iyo dedejinta. Waxa aanu bixinaa fursado dedejin fasal iyo maaddo ah oo ka bilaabma fasallada hore, iyo sidoo kale dhabbooyin ah xisaabta, CTE ga, iyo Saacadaha Waxbarasho ee Dugsiga Sare iyo Kuliyadda "Dual Credit", Meelaynta Sare "AP ga", iyo Shahaadada Caalamiga ah "IB ga" oo laga heli karo dugsiyada sare. Marka laga yimaaddo waxbarashada, waxa aanu aqoonsanaa hibada hoggaanka, halabuurka, iyo farshaxanka.

9. **Haddii aad qorshaynayso inaad samayso Barnaamij Daraasadeed oo CTE ah oo cusub, fadlan magacaw barnaamijka la doonayo in la bilaabo, jadwal-wakhtiyeedka, iyo tallaabooyinka la qaaday ama la qaadayo.**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ka go'an ballaadhinta fursadaha CTE si ay ula jaanqaadaan waxyaabaha ay xiiseeyaan ardaydu iyo baahiyaha shaqaalaha. Dugsiga Sare ee Lincoln waxa uu bilaabi doonaa barnaamij Sayniska Caafimaad ah oo cusub, isaga oo u diyaarinaya ardayda mihnadaha waaxda daryeelka caafimaadka ee kobcaysa iyada oo loo marayo waxbarasho camali ah iyo shuraakooyin warshadeed. Taas marka laga yimaaddo, Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waxa uu ballaadhin doonaa barnaamijkiisa Warbaahinta "Broadcasting" si uu ugu daro soo nooleynta wargeyska taariikheed, ka siinta ardayda khibrado waaqici ah saxafinimada, soo saarista warbaahinta, iyo sheeko-ka-sheekaynta. Labadan barnaamijba waxa ay bilaabmi doonaan inta lagu gudo jiro sanad waxbarasheedka 2025-2026. Kooxdeena ayaa hogaamin doona hannaanka codsiga ee ODE marka

dugsiyadu xaqiijiyaan tirada saadaashooda ee barnaamij kasta, waxana ay si toos ah iskaashi uga la sameyn doonaan kooxaha dugsiga dhisidda barnaamij xooggan oo leh dhabbo saddex-sanadood ah.

PPS waxa ay raacdaa heer-nidaameed oo ay ku ballaadhinayso CTS, kaas oo xaqiijinaya barnaamijyada cusubi inay la jaanqaadayaan Nidaamkeena Isku Xidhan ee Dhabbaha isla markaana ay ka turjumayaan isbedellada shaqaalaha gobolka. Waxa aanu si firfircoon uga la shaqaynaa shuraakooyinka warshadaha iyo kuwa dugsiga sare kadib qorshaynta barnaamijyada tayada-sarreeya ee ardayda u diyaariya guusha mihnadeed. Waxa aanu uga faa'iidaysanaa YouScience inaanu ardayda kaga caawino sahaminta dhabbooyinka mihnadeed ee ku salaynaya awoodahooda, anaga oo xaqiijinayna galaangal helid fursadaha ah oo caddaalad ah. PPS waxa ay sii wadi doontaa inay dugsiyada ka taageerto samaynta barnaamijyo CTE ah oo cusub oo la jaanqaadaya shuraakooyinka warshadeed iyo kuwa waxbarasheed, iyada oo la xaqiijinayo dhammaan ardaydu inay galaangal u helaan khibrado waxbarasho oo mihnadda ku xidhan oo tayo-sarreeya. Barnaamijyo kastaa waxa ay la jaanqaadi doonaan Agabka Qiimeynta Barnaamijka Tayada Sarreeya ee ODE si loo xaqiijiyo qoto-dheeraansho, waaritaan, iyo la jaanqaad shaqaaleed.

10. **Waa maxay khibradaha waxbarashada ee CTE qeexday ee shaqada ku salaysan ee diyaarka u ah ardayda? Sharrax wixii dedaalo ah ee aad samaynaysaan si aad u ballaadhisaan fursadahan.**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay bixisaa khibrad CTE-qeexday oo shaqada ku salaysan oo kala duwan si ay u xaqiijiso in ardaydu khibrad camali ah u helaan mihnadaha kuwaas oo waafaqsan waxyaabaha ay xiiseeyaan. Isu duweyaasha mihnadeed ee dugsiyada sare waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan fudaydinta fursadahan, taas oo ay kamid tahay shaqo barasho, shaqo fiirsasho, jawlado warshadeed, iyo ka qaybqaadashooyin martida hadalka jeedisa ee dhabbooyin mihnadeed oo badan. Waxa aanu sii wadnaa xoojinta iskaashiga aanu la leenahay Isbahaysiga Shaqaalaha Portland (PWA), kaas oo ardayda ku xidha khubaro warshadeed iyo khibrado mihnadeed oo shaqooyin badan oo kala duwan ah. Taas marka laga yimaaddo, waxa aanu iskaashi la sameynaa Boedecker Foundation si aanu fursado waxbarasho oo la khaasyeelay oo shaqada ku salaysan uga bixino farshaxanka, anaga oo xaqiijinayna in ardaydu galaangal u helaan khibrado halabuur leh oo warshadeed.

Si aanu u ballaadhino isla markaana uga dhigno mid loo siman yahay galaangal u helidda waxbarashada shaqada ku salaysan, waxa aanu horumarinaynaa boortal ay adeegsadaan ardaydu halkaas oo dhammaan fursadaha lagu ururin doono hal goob. Tani waxa ay xaqiijisaa in arday waliba—iyada oo aan la eegayn dugsiga iyo taariikhda—uu si fudud galaangal ugu heli doono isla markaana uga qaybqaadan doono khibradahan. Hannaankeenu waxa uu la jaanqaadaa Nidaamka Isku Xidhan ee Dhabbaha, iyada oo la xaqiijinayo in shuraakooyinka warshadaha, bulshada, iyo kuwa dugsiga sare kadib ay si firfircoon uga qaybqaadanayaan taageeridda diyaargarawga mihnadeed ee ardayda. Iyada oo sii wadda sameynta shuraakooyin istiraatiijiyadeed iyo bixinta galaangal helid loo marayo tiknoolajiyadda, PPS waxa ay abuuraysaa nidaam waxbarasho oo dhamaystiran, oo cadaalad ah, oo la cabbiri karo oo shaqada ku salaysan, kaas oo u diyaariya dhammaan ardayda guusha mustaqbalka.

11. **Ardaydiinu fursad ma u helaan kasbashada saacado waxbarasho kuliyadeed oo CTE ah inta ay ku jiraan dugsiga sare? Haddii ay tahay haa, wax sharraxaad ah looma baahna. Haddii ay tahay maya, fadlan sharrax.**

Haa

## Ka Qaybgelinta Hawlaha ee Bulshada

1. **Waa maxay horumarinada aad samayseen marka aad bulshadiina hawlaha ka qaybgelinaysaan, sida ardayda diirad-saaridda, qoysaska, iyo shaqaalaha, labadii sano ee lasoo dhaafay? Waa maxay caqabadaha, haddiiba ay jiraan, ee weli sii jira ama la wajahay?**

Labadii sano ee lasoo dhaafay, waxa aanu horumarinay dedaalada aanu ugu jirno inaanu bulshada hawlaha ka qaybgelino, anaga oo ka dhigayna kuwo u nidaamsan, u hufan, oo loogu dhan yahay si ka badan sidii hore. Waxa aanu ballaadhinay jadwal-wakhtiyeedka si loo helo ka qaybqaadasho hawleed oo ka qoto dheer sidii hore, anaga oo ku bilownay bishii Oktoobar wada hadallada kooxaha diirad-saaridda, oo ay ku xigto xog-ururin mudnaanaha bulsheed ah, xog-ururin aasaasi ah, iyo wareegyo badan oo ra'yi-celin ah. Markii miisaaniyaddii isbeddeshay, waxa aanu xoojinay daahfurnaanta anaga oo si furan u wadaagayna dhimitaanada suuragalka ah isla markaana fudaydinayna fadhiyada dhegaysiga iyo kulannada dadweynaha. Aragtiyaha la ururiyey waa la nidaamiyey waxana lala wadaagay Guddiga Dib U Eegista Miisaaniyadda Bulshada (CBRC) iyo Guddiga si loogu adeegsado go'aan-gaadhista.

Inkasta oo ay horumaradani jiraan, haddana caqabaduhu weli waa ay taagan yihiin. Khayraadka qoondaysan ee xaddidani waxa ay ka dhigan yihiin dedaalada ka qaybqaadashada in ay tahay in lagu miisaamo masuuliyadaha jira. Inkasta oo aanu kordhinay wacyigelinta aanu siino bulshooyinka la faquuqi jirey taariikh ahaan, haddana ka qaybqaadashada kooxaha diirad-saaridda dhexdoodu weli waa aag kobcin u baahan, maadaama oo ka qaybqaadashada qoysaska caaddaanka ahi ay weli yihiin kuwo aad uga badan marka bulshooyinka kale loo eego. Mustaqbalka, waxa naga go'an wanaajinta xeeladaheena aanu ku xaqiijinayno in dhammaan codadka, gaar ahaan kuwa ardaydeena diirad-saaridda iyo qoysaskooda, si siman loogu metelo go'aan-qaadashada.

**3. Liis garee xeeladaha loo adeegsado in lagaga qaybgeliyo ardayda diirad-saaridda iyo qoysaskooda hawlaha la xidhiidha qorshaha la isdhexgeliyey ee dhammaan muddada hannaanka qorshaynta. (Ugu yaraan laba xeeladood ayaa loo baahan yahay.)**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay dhaqangelisaa xeelado badan si ay ugaga qaybgeliso ardayda diirad-saaridda iyo qoysaskooda dhammaan hannaanka qorshaynta, iyada oo xaqiijinaysa in codadkoodu qaabeeyaan hindiseyaasha degmada. Waxa aanu u qorshaynay dedaallo ka qaybqaadasho oo gaar ah in aanu kula xidhiidhno bulshooyinkan. Waxa aanu sidoo kale leenahay heerar ka qaybqaadasho oo kala duwan oo u dhexeeya diirad-saarid miisaaniyad guud illaa kuwo barnaamij gaar u ah.

Istiraatiijiyadda guud waxa ay ka koobnayd ka qaybgelinta hawlaha ee kooxaha diirad-saaridda bulshooyin gaar ah sida Guddiga La-talinta Bulshada RESJ, Golaha La-talinta Waalidka ee Waxbarashada Soogalootiga, Dhaqanka gudaha Fasalka, Guddiga Waalidka Hindiga ah ee Waxbarashada Hindida ee Cinwaanka VI, iyo Golaha La-talinta Qoyska ee Waxbarashada. Kooxanahani waxa ay si toos ah uga qaybqaataan ka talabixinta siyaasadaha, mudnaanaha miisaaniyadda, iyo horumarinta barnaamijka.

Kooxda CTE ga ayaa qabata ka qaybqaadashooyin barnaamij gaar u ah oo si gaar ah diiradda loogu saarayo CTE ga iyo hindiseyaasha waxbarashada mihnadda ku xidhan. Golaha Ardayda PPS ayaa door muhiim ah ka ciyaara qaabaynta barnaamijyada CTE ga iyaga oo codka ardayga kor ugu qaadaya go'aan-qaadashada. Golahan, oo ka kooban arday kasoo kala jeeda taariikho iyo dhabbooyin mihnadeed oo kala duwan, ayaa ra'yi-celin toos ah ka bixiya deeqaha barnaamijka, fursadaha waxbarashada shaqada ku salaysan, caqabadaha ku gadaaman guusha, xeeladda iskaashiga, iyo suuqaynta CTE ga. Aragtiyahoodu

waxa ay ka qaybqaateen xeeladaha lagu ballaadhinayo shahaadooyinka ay warshaduhu aqoonsan yihiin, lagu kordhinayo wacyiga dhabbooyinka CTE ga, laguna horumarinayo galaangalka cadaaladda ah ee loo helayo khibradaha waxbarashada mihnadda ku xidhan. Xeeladuhu waxa ay xaqiijiyaan in codadka ardayda iyo warshaduhu labaduba ay qayb ka noqdaan qorshaha xeeladeed ee CTE ga, taas oo keenaysa dhabbooyin mihnadeed oo loogu dhan yahay, waxtar u leh, oo saameyn u leh si ka badan sidii hore oo ay helaan dhammaan ardayda PPS.

Anaga oo ku dhaqangelinayna xeelado kala duwan kooxaheena diirad-saaridda, waxa aanu xaqiijinaa in qorshaheena la isdhexgeliyey uu ka turjumo baahiyaha iyo himilooyinka ardayda ka soo jeedda bulshooyinka la faquuqo.

**4. Liis garee xeeladaha loo adeegsado in lagaga qaybgeliyo shaqaalaha, aan ahayn kuwa waxbarasheed "classified" iyo kuwa shahaadada haysta "certified", hawlaha la xidhiidha qorshaha la isdhexgeliyey ee dhammaan muddada hannaanka qorshaynta. (Ugu yaraan laba xeeladood ayaa loo baahan yahay.)**

PPS waxa ay dedaal qorshaysan oo dheeraad ah ugu jirtaa ka qaybgelinta hawlaha ee firfircoon ee shaqaalaha heerarka badan. Tan waxa kamid ah wareegyo badan oo ka qaybqaadashada maamuleyaasha ah, fadhiyo xafiiska dhexe ah, iyo kulanno macallimiiiin, iyada oo la xaqiijinayo in shaqaalaha shahaadada haysta "certified" iyo shaqaalaha aan kuwa waxbarasheed ahayn "classified" ay fursado u helaan qayb ka noqoshada hannaanka miisaaniyad-sameynta iyo qorshaynta.

Ka Qaybqaadashada Maamulka iyo Hoggaanka: Hoggaamiyeyaasha dugsiyada waxa laga qaybgeliyey dhawr wareeg oo wada hadallo qaabaysan ah oo ay aragti kaga dhiibanayaan qoondaynta khayraadka, xeerarka shaqaalaynta, iyo mudnaanaha waxdhigiseed. Wada hadalladani waxa ay xaqiijiyeen in ra'yi-celinta laga helo hoggaamiyeyaasha dugsiyadu ay si toos ah u qaabeeyaan wax ka bedellada lagu sameynayo dhimitaanada, xeeladaha khafiifinta, iyo habraacyada miisaaniyad-sameynta ee isbedbedela.

Kulannada Macallimiinta & Fadhiyada Xafiisyada Dhexe: Kulannada macallimiinta iyo fadhiyada dhegaysiga ee shaqaalaha xafiiska dhexe waxa ay u sahleen macallimiinta inay gudbiyaan walaacyada oo ay ra'yi-celin wakhtiga-dhabta ah ka bixiyaan sida go'aanada miisaaniyaddu u saameeyaan fasallada, taageerada waxdhigiseed, iyo adeegyada ardayda. Natiijo muhiim ah oo ka dhalatay wada hadalladan ayaa ahayd in laga wareego dhimitaanadii adkaa oo loo wareego xeelado isbedbedela, sida go'aan-qaadasho dugsiga ku salaysan iyo wax ka bedello lagu sameeyo qoondaynada tababarka waxdhigiseed, oo ku salaysan aragtida shaqaalaha.

Nidaamkan ka qaybqaadashadu waxa uu la jaanqaadayaa baaxadda La-talinta iyo Ka Qaybgelinta, iyada oo la xaqiijinayo in codadka shaqaaluhu aanay keliya qayb ka noqon ee ay sidoo kale qaabeenaan go'aanada degmada. Iyada oo si is-daba joog ah loo wanaajinayo qorsheyaasha iyada oo lagu salaynayo ra'yi-celinta shaqaalaha, waxa aanu sii wadnaa inaanu mudnaanta siino go'aan-qaadashada hufan, iskaashiga leh, ee xogtu-jihayso.

**5. Muujinta ka qaybgelinta hawlaha ee kooxaha diirad-saaridda. Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee aad ka barateen dedaalkan ka qaybgelinta?**

Ahmiyad weyn baa ku jirta in loo abuuro goobo qorshaysan, oo bulsheed ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee bulshooyinka Madawga ah iyo kuwa Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid. Ka qaybqaadashooyinka Dhaqanka gudaha Fasalku waxa ay xoojiyeen in ka qaybqaadashada macnaha lihi

ay ka ballaadhan tahay wacyigelintii soo jireenka ahayd—waxa ay u baahan tahay kalsooni-dhisid, hoggaamin la wadaago, iyo dhegaysi qoto dheer. Anaga oo sameynayna goobo dan-wadaag oo kala gaar ah, waxa aanu ku dedaalnay sharfidda khibradaha gaarka ah ee bulshooyinka Madawga ah iyo Kuwa Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid anaga oo dardargelinayna doodo furan oo laga yeesho natiijooyinka waxbarasheed, ammaanka, iyo ka mid ahaanshaha.

Inkasta oo caqabadaha nidaameed ay weli sii jiraan, haddana wadasheekaysiyadan bulshadu hoggaaminayso waxa ay iftiimiyeen xalal lagu dhaqaaqi karo oo si toos ah u saameynaya nidaamyada wax dhigiseed. Ka qaybqaadashooyinku waxa ay xoojiyeen baahi loo qabo waxdhigis la jaanqaadaysa dhaqanada ardayda, matalaad manhajka ah, iyo isla xisaabtan la joogteeyo oo ka yimaadda hoggaanka degmada. Waxa xusid mudan, ka qaybqaateyaashu inay xoojiyeen baahida degdegga ah ee loo qabo ficilka iyo isla xisaabtanka - shaqadani kuma sii sugnaan karto marxaladda wada hadalka; waa in loo turjumo ficillo la taaban karo iyo natiijooyin la cabbiri karo oo si toos ah u saameynaya ardayda Madawga ah iyo Kuwa Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid.

Intaas waxa dheer, ka qaybqaateyaashu waxa ay ku taliyeen dedaallada mustaqbalku inay mudnaanta siiyaan iskaashiyo qoto dheer oo lala yeesho hoggaamiyeyaasha sare, kormeereyaasha maamuleyaasha, iyo Guddiga Waxbarashada. Iyada oo si firfircoon looga qaybgelinayo wadasheekaysiyadan kooxeed hoggaamiyeyaal dheeraad ah oo dhammaan dugsiyada PPS ka socda, ka qaybqaateyaashu waxa ay kalsooni ku dareemaan awoodda ay u leeyihiin inay si ka dhakhso badan sidii hore u jiheeyaan natiijooyinka oo hoggaamiyeyaasha kula xisaabtamaan dhaqangelinta guusha leh.

**6. Muujinta ka qaybgelnta hawlaha ee shaqaalaha (shaqaalaha aan kuwa waxbarasheed ahayn "classified" iyo/ama kuwa shahaadada haysta "certified"). Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee aad ka barateen dedaalkan ka qaybgelinta?**

Kulankan macallimiintu waxa uu muujiyaa ka qaybgelinta hawlaha ee shaqaalaha shahaadada haysta "certified", oo ay kamid yihiin macallimiinta, masuullada dugsiyada, iyo macallimiinta liisanka haysta, iyo sidoo kale shaqaalaha aan kuwa waxbarasheed ahayn "classified" ee u xilsaaran doorarka taageerada. Kulanka Macallimiintu waxa uu shaqaalaha dhammaan heerarka kala duwan ee degmada siiyey madal ay kusoo bandhigaan walaacyada, kusoo jeediyaan su'aalaha, oo ra'yi-celin kaga bixiyaan qorshaynta miisaaniyadda iyo saameynta ay ku leedahay dugsiyada. Qodobka ugu muhiimsan ee laga faa'iiday Kulankii Macallimiintu waxa uu ahaa baahida muhiimka ah ee loo qabo isgaadhsiin waadax ah, oo hufan, oo kusii talagal leh "proactive" oo la xidhiidha go'aanada miisaaniyadda iyo saameynta ay ku leeyihiin shaqaalaha, khayraadka, iyo barnaamijyada waxdhigiseed. Macallimiintu waxa ay cabbireen walaacyada ay ka qabaan dhimitaanada shaqaalaynta, isbeddelada lagu samaynayo barnaamijyada xagaaga, iyo dhimitaanada khubarada liisanka haysta, iyaga oo xoojinaya hubanti la'aanta ay ka qabaan sida go'aanadan loo gaadhi doono.

Macallimiintu waxa ay doonayaan macluumaad sii faahfaahsan oo wakhtiga munaasab ku ah oo ku saabsan sida go'aanada miisaaniyaddu u saameyn doonaan doorarkooda, ardayda, iyo bulshooyinka dugsiga. Jawaabuhu waxa ay muujiyeen in su'aalo badan aan weli laga jawaabin, taas oo iftiiminaysa baahida loo qabo ka qaybelin joogto ah iyo farriimo waadax ah oo laga helo hoggaanka degmada.

Taas marka laga yimaaddo, ka qaybgelintu waxa ay xoojisay in shaqaaluhu ay doonayaan in laga qaybgeliyo hannaanka go'aan-qaadashada, ee aan keliya la wargelin marka go'aanada la gaadho. Macallimiin badan ayaa codsaday in hufnaan dheeraad ah lagu sameeyo sida dhimitaanada U

Dhignaanshaha Labada-Gellin "Full-Time Equivalent" (FTE) loo go'aamin doono waxana ay xoojiyeen baahida loo qabo habraaacyada miisaaniyad-sameynta ee ardayda ahmiyadda siiya kuwaas oo mudnaanta siiya natiijooyinka cadaaladda ah.

Dedaalkani waxa uu hoosta ka xarriiqay in go'aanada miisaaniyadda ay tahay in loo sheego si waadax ah iyo qaab qiraya walaacyada macallimiinta, taas oo xaqiijinaysa in shaqaaluhu dareemaan in la maqlayo oo la qiimeynayo iyaga oo loo tixgelinayo inay yihiin daneeyeyaasha muhiimka ah ee qorshaynta dhaqaale ee degmada.

**7. Muujinta ka qaybgelinta hawlaha ee kooxda diirad-saaridda, shaqaalaha, ama bulshada. Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee aad ka barateen dedaalkan ka qaybgelinta?**

Waxyaabihii laga bartay Xog-ururinta Bulshada iyo ka qaybgelinta hawlaha ee bulshada ee guud waxa loo bandhigay Guddiga PPS iyo Guddiga Dib U Eegista Miisaaniyadda Bulshada (CBRC) markii ay taariikhdu ahayd Maarso 4, 2024.  CBRC waxa ay dib u eegtaa, qiimaysaa, oo talooyin uga soo jeedisaa Guddiga Agaasimeyaasha PPS wixii la xidhiidha Miisaaniyadda uu Soo Jeediyey Kormeeraha Guud iyo arrimaha miisaaniyadeed ee kale ee CBRC ama Guddigu aqoonsadaan.  Guddigu waxa ay ka kooban yihiin siddeed illaa laba iyo toban xubnood oo mutadawaciin ah iyo xubno arday ah. Waxa ay kulmaan bil kasta inta lagu gudo jiro xilliga horumarinta miisaaniyadda, Noofembar illaa Juun, iyaga oo yeesha kulanno muddaysan oo dheeraad ah haddii loo baahdo.

Intii lagu gudo jiray qaybta S&J ee soo jeedinta, xubnaha Guddiga iyo CBRC waxa laga dalbaday inay soo jeediyaan aragtiyo iyo su'aalo ku saabsan xogta. Waxa ay daneynayeen fahanka sida waxyaabaha laga bartay ka qaybqaadashooyinkan loogu turjumay go'aano miisaaniyadeed. Aagagga daneynta ee gaarka ahi waxa ay diiradda saarayeen sida PPS ay isugu miisaamayso maalgelinta muhiimka/aasaasiga ah iyo maalgelinta isbedbedesha ee dugsiyada iyo macallimiin fasal in loo hayo xajmiyada fasallada ee yaryar iyo taageerooyinka tooska ah. Sidoo kale waxa ay ra'yi-celin ka bixiyeen saameynada dhimitaanada shaqaalaynta ee gaarka ah iyo waxyaabaha laga bartay ka qaybqaadashooyinka kale.

**8. Muujinta ka qaybgelinta hawlaha ee kooxda diirad-saaridda, shaqaalaha, ama bulshada. Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee aad ka barateen dedaalkan ka qaybgelinta?**

Wixii ugu weynaa ee laga bartay kulankii Golaha La-talinta Waalidka ee Waxbarashada Soogalootiga waxa uu ahaa baahida daruuriga ah ee loo qabo matalaad xooggan, u dhannaansho, iyo ka qaybgelin hawlaha ah oo la jaanqaadaysa dhaqanka ardayda oo la siiyo qoysaska soogalootiga ah, ardayda laba-luuqadleyaasha ah ee soo baxaya, iyo qoysaska wajahaya saboolnimada. Waalidiintu waxa ay cabbireen kalsooni la'aan iyo xidhiidh aanay la lahayn shaqaalaha dugsiga, gaar ahaan marka is-weydaarka shaqaaluhu uu bato isla markaana shaqaalaha ku hadla Isbaanishku ay gabaabsi yihiin. Arrintani waxa ay iftiiminaysaa baahida degdegga ah ee loo qabo haysashada macallimiinta laba-luuqadleyaasha ah iyo xaqiijinta shaqaale joogto ah si loo dhiso xidhiidho macno leh.

Faallo kale ayaa waxa ay ahayd ahmiyadda nashaadaadka dugsiga ka baxsan, barnaamijyo muusigeed, iyo dabbaaldegyo dhaqan oo lagu dardargelinayo dhiirigelinta, ka qaybqaadashada, iyo badqabka ardayda. Waalidiintu waxa ay xoojiyeen in galaangal u helidda fasallo muusigeed oo sare iyo nashaadaad dhaqan ahaan loogu dhan yahay sida dabbaaldegyada Día de los Muertos ay ka caawiso ardayda inay dareemaan in la arkayo oo la qiimeynayo. Si walba ha noqotee, farqiyo ayaa la ogaaday, maadaama oo

dugsiyada qaar ay bixiyaan khibrado dugsiga ka baxsan oo ka badan dugsiyada kale, taas oo ka turjumaysa kala duwanaanshaha heerarka bulsho/dhaqaale.

Taas marka laga yimaaddo, waalidiintu waxa ay walaacyo ka muujiyeen ka qaybqaadashada kulannada iyo hannaanada go'aan-qaadashada ee dugsiga, iyaga oo sheegaya in qoysaska caddaanka ah ay yihiin kuwa inta ugu badan laga qaybgeliyo halka qoysaska aan Ingiriisida ku hadal ay dareemaan in laga reebo. Talooyinka ayaa waxa kamid ahaa kulanno maamule-waalid oo waajib ah, wanaajinta wacyigelinta dadka aan ku hadal Ingiriisida, iyo galaangal helid caddaalad ah oo loo helo wada hadallada hoggaaminta dugsiga.

Dedaalkan ka qaybgelintu waxa uu xoojiyey ahmiyadda shaqaalaynta la jaanqaadaysa dhaqanada ardayda, ka qaybgelinta hawlaha ee qoyska ee qorshaysan, iyo galaangal cadaalad ah oo loo helo khayraadka dugsiga. Dugsiyadu waa inay mudnaanta siiyaan shaqaaleysiinta shaqaalaha laba-luuqadleyaasha ah, iyaga oo abuuraya goobo go'aan-qaadasho oo loo dhan yaahy, oo ballaadhinaya barnaamijyada la jaanqaadaya dhaqanka si loo xaqiijiyo in dhammaan qoysasku dareemaan in lasoo dhaweynayo oo la qiimeynayo.

**9. Muujinta ka qaybgelinta hawlaha ee kooxda diirad-saaridda, shaqaalaha, ama bulshada. Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee aad ka barateen dedaalkan ka qaybgelinta?**

PPS waxa ay qabatay xog-ururin bulsho heer qaran ah oo ka bilaabatay Oktoobar illaa Noofembar 2024. Guud ahaan, ku dhawaad 4,000 oo dad ah ayaa ka jawaabay oo ay ku jiraan waalidiinta, shaqaalaha PPS, ardayda, iyo xubnaha bulshada. Waxa aanu yeelanay ka qaybqaadasho wanaagsan waxana aanu aragtiyo ka helnay qaybaha bulshada ee kala duwan. Boqolkiiba toddobaatan kamid ah jawaabaha waxa laga helay waalidiinta 13% na waxa laga helay shaqaalaha wax dhigista. Ka qaybqaateyaashu waxa ay soo jeediyeen in PPS meesha ka saarto dhawr barnaamij halkii ay dhimi lahayd adeegyada dhammaan barnaamijyada.  Ka qaybqaateyaashu waxa ay xoojiyeen ahmiyadda waxbarashada, iyo waxdhigista fasalka in ka badan shuraakooyinka bulshada ama nashaadaadka dugsiga ka baxsan.

Jawaabaha tayaraaca ah, shaqaaleysiinta iyo haysashada shaqaale tayo-sarreeya ayaa ahaa mawduuca inta ugu badan lagu carrabaabay 18% kamid ah faallooyinka ka hadlaya shaqaalaynta. Waxa aanu sidoo kale aragnay faallooyin la xidhiidha farshaxanka muuqaaleed iyo ka bandhigeed, waxbarashada gaarka ah, iyo walaacyo miisaaniyadeed.

Markii la weydiiyey, "Haddii aad beddeli kari lahayd hal shay oo ku saabsan dugsiga ama degmada, muxuu noqon lahaa?" Isbeddelkii inta ugu badan lasoo jeediyey waxa uu ahaa dhimista xajmiyada fasallada. Markii la weydiiyey "Waa maxay qodobka ugu wanaagsan ee dugsigan ama degmadan?", macallimiin daryeel leh ayey ahayd jawaabta inta ugu badan la bixiyey.

Markii la weydiiyey heerka guusha PPS ee dhammaan sagaalka aag, jawaabta ugu qiimeynta-saraysay waxa ay ahayd Kala Duwanaanshaha & U Dhannaanshaha ta ugu qiimeynta-hoosaysayna waxa ay ahayd Guusha Ardayga

Markii la weydiiyey ahmiyadda ay leedahay in PPS ay diiradda saarto isla sagaalkaas aag si ay u guulaysato, jawaabtii ugu qiimeynta saraysay waxa ay ahayd Waxdhigista Fasalka jawaabtii ugu qiimeynta hoosaysayna waxa ay ahayd Shuraakooyinka Bulshada.

**10.** ***Jawaab waxa loo baahan yahay keliya haddii codsi loo gudbinayo dugsi madax bannaan oo la kafaalo qaaday.*** **Haddii dugsi madax bannaan uu codsi u gudbinayo degmo, hal dukuminti caddeyn ah "artifact" waa in laga soo gudbiyaa halkii dugsi ee madax bannaanba waana in uu muujiyaa ka qaybgelinta hawlaha ee kooxda diirad-saaridda, shaqaalaha, ama bulshada. Yaa laga qaybgeliyey dukumintiga caddeynta ah "artifact" ee dugsi madax bannaan oo kasta? Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee laga bartay dedaal(ada) ka qaybgelinta?**

**Emerson:** Ra'yi-celintii laga ururiyey fadhiyadeena dhegaysiga qoysasku waxa ay qayb ka noqdeen hannaankeena qorshaynta iyo miisaaniyad-sameynta, taas oo naga caawinaysa inaanu mudnaanta sino aagagga sida taageerada waxbarasheed, la xidhiidhka qoysaska, iyo dardargelinta ka qaybgelinta ardayda. Tusaale ahaan, intii lagu gudo jirey wadasheekaysiyadeenii bilawga, mawduuc soo noqnoqday baa ahaa baahida loo qabo xidhiidh korodhsan ama in dheeraad ah wax ku ool ah oo ka dhexeeya dugsiga iyo guriga. Waxa aanu aragnay in qoysasku doonayeen in la yareeyo xidhiidhka dijitaalka ah oo la kordhiyo xidhiidhka "habkii hore" ah. Arrintaas awgeed waxa aanu soo iibsanay boodh xayeysiis "sandwich board" oo cusub oo aanu dhignay albaabka hore oo ay ku yaallaan xusuusino maalinle hadda ah oo midabo leh, waxa aanu sidoo kale bixinaynaa wargeysyadeena oo daabacan ama lagu diro iimeylka waxana aanu boodh xayeysiis munaasaadaha bulsheed ah dhigaynaa albaabkeena hore. Hannaankan qiimeynta baahiyuhu waxa uu noo sahlaa in aanu joogtayno ka jawaabidda baahiyaha bulshadeena, isaga oo hagaya horumarinta yoolasha dugsigeena iyo qoondeynta dhaqaale ee sanadka xiga.

**LeMonde:** Marka la eego xog-ururinta/wada hadalka Guddigeena Agaasimeyaasha, waxa aanu baranay in xogta ka qaybqaadashadu ay iftiimisay gaabab ka jira guusha waxbarasheed isla markaana ay hoosta ka xarriiqday ahmiyadda taageerada loogu talagalay waxbarashada bulsho-shucuureed, dhismaha xirfadaha waxbarasheed, iyo sidoo kale horumarinta xirfadeed ee u adeegidda ardayda naafada ah iyo bulshooyinka la faquuqo taariikh ahaan ee kale. Jawaab ahaan, waxa aanu u qoondaynay khayraad miisaaniyadeed iibsiga khayraad waxdhigiseed oo ardayda si macno leh uga qaybgeliya hawlaha isla markaana taageera wax ka qabashooyinka waxbarasheed. Qiimeyntu waxa ay sidoo kale qayb ka noqotay go'aanka shaqaaleysiinta shaqaale dheeraad ah oo siiya taageero fasal iyo wax ka qabashooyin waxbarasheed oo bartilmaameedsan ardayda aan gaadhin halbeegga.

**Portland Arthur Academy:** Yaa laga qaybgeliyey/yaa aad wacday, sababma ayaana aad u dooratay qoysaskaas?
Qoysaska laga qaybgeliyey hawlaha waxa ay ahaayeen qoysaska ardayda ku cusbaa dugsiga ama kasoo jeeda bulshooyin qowmiyadeed ama isireed oo la faquuqo. Qoysaskan waxa loo doortay si loo xaqiijiyo inay dareemaan soo dhaweyn, taageero, oo lagu wargeliyo safarka waxbarasho ee ilmahooda. La xidhiidhidda qoysaskani waxa ay ahayd mid muhiim u ah dhisidda kalsooni, bixinta khayraadka dugsiyeed ee daruuriga ah, iyo xaqiijinta in carruurtoodu ay galaangal u helaan dhammaan fursadaha waxbarasheed iyo kuwa dugsiga ka baxsan.

Muxuu ahaa wixii ugu weynaa ee laga bartay dedaalada ka qaybgelinta?
Wixii ugu badnaa ee laga bartay wadasheekaysiyadani waxa uu ahaa ka helitaanka aragti waxa guushu uga dhigan tahay qoysaska iyo sida dugsigu ugu taageeri karo ardayda iyo qoysaska labadaba inay dareemaan kamid ahaansho. Qoysas badan ayaa xoojiyey ahmiyadda ay carruurtooda u leedahay dareemitaanka kamid ahaanshaha iyo ahaanshaha qayb kamid ah bulshada, iyaga oo iftiimiyey xidhiidhada xooggan, ee shakhsiyeed ee lala yeesho shaqaaluhu in ay fure u ahaayeen xoojinta u dhannaanshaha.

Ra'yi-celin togan ayaa laga bixiyey macallimiinta wakhti ku qaatay fahanka iyo ka qaybgelinta hawlaha ee ardayda, iyaga oo ka caawinaya inay dareemaan in la arkayo oo la maqlayo. Qoysasku waxa ay sidoo kale xoojiyeen ahmiyadda ay leedahay xidhiidhka furan ee laga yeesho habdhaqanka iyo horumarka ilmahooga. Qaar baa waxa ay wadaageen sheekooyin ku saabsan wakhtiyo ay ilmahoogu dareemeen xiise ama ka qaybqaadasho fasalka ah, taas oo xoojinaysa qiimaha waxbarashada macnaha leh, ee isdhexgalka leh. Taas marka laga yimaaddo, qoysasku waxa ay cabbireen inay carruurtooda la doonayaan inay taageero ka helaan horumarinta xirfadaha bulsheed, taas oo xoojinaysa ahmiyadda ka caawinta ardayda dhismaha xidhiidho iyo u dhex mushaaxa xaaladaha bulsheed si togan.

**Portland Village School:** Qiimeynta baahiyaha ee PVS waxa kamid ahaa xog-ururino shaqaale iyo kuwo waalid, kooxda diirad-saaridda waalidka, xogta habdhaqanka, iyo qiimeyno waxbarashada dhexdeeda iyo dhammaadka waxbarashada ah oo heer dugsi ah. Taas marka laga yimaaddo, wada hadallada intii lagu gudo jiray kulannada Heerka II iyo kuwa kooxda SIT ayaa loo adeegsaday in lagu jiheeyo hannaankeena. Xogtu waxa ay iftiimisay dhibaatooyinka habdhaqanka iyo xakameynta shucuureed ee haysta ardayda fasalladeena ugu da'da yar (K-3), iyada oo tacadiyada jidheed ay ahaayeen waxa ugu weyn ee keena gudbinnada fasallada ugu da'da yar. Taas marka laga yimaaddo waxa la ogaaday inay jiraan aagag waxbarasheed oo u baahan horumarin dhanka xisaabta. Wada hadalka iyo falanqayntu waxa ay tilmaameen inay jiraan dhibaatooyin waxdhigis oo haysta fasallada da'da yar taas oo ay sabab u tahay kala joogsiga ay waxbarashada ku sababaan ardayda aan is-xakameyn, iyo baahi loo qabo in kooxo yaryar lagu la shaqeeyo ardayda waaweyn si loo xidho gaababka waxbarasho. Waxa xusid mudan in heerkeena sarreeya ee ardayda leh IEP yada iyo 504 yada ay la dhibaataysan yihiin xakameynta shucuurta. Jawaab ahaan, waxa aanu qoondaynay khayraad miisaaniyadeed si aanu ugu sii wadno taageerada baahiyaha habdhaqanka ardayda iyo SEL ka waxana aanu ka hawgeli doonaa yareynta xajmiyada fasallada anaga oo diiradda saarayna fasallada ugu da'da yar, si ardaydaas la dhibaataysan habdhaqanka ama waxbarashadu u heli karaan taageero dheeraad ah, iyo sidoo kale kooxo wax ka qabasho xisaabeed oo loo sameeyo dhammaan ardayda.

Iyada oo la jaanqaadaysa xeeladaha Akownka Maalgelinta Ardayda ee degmadeena (SIA), qiimeynta baahiyaha dhamayska tiran ee Portland Village School waxa ay si toos ah qayb uga ahayd qorshaheena, taas oo xoojinaysa habraacyadeena kala duwan ee lagu jaangooyey ardayda Portland Village School. Hannaankeena qiimeyntu waxa uu adeegsaday aragti cadaalad ah si uu dib ugu eego xog-ururinta waalidka, kooxda diirad-saaridda waalidka, xog-ururinta shaqaalaha, iyo falanqaynta dukumintiyada SIT iyo kuwa Heerka II, iyo sidoo kale xogta habdhaqanka iyo waxbarashada.

**Cottonwood:** Xog-ururinteena qoyska ee Gu'ga 2024 waxa ay bixisay aragtiyo nagu hagi doona inaanu wanaajino nidaamyadeena Waxbarashada Goobeed anaga oo u marayna fadhi dhegaysi. Anaga oo kaashanayna Guddigeena, waxa aanu qabanay “World Café” si aanu uga qaybgelino ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha aqoonsiga mudnaanaha muhiimka ah ee horumarinta dugsiga. Hannaankan iskaashigu waxa uu bixiyey madal codadka kala duwani ay uga qaybqaataan qaabaynta himiladeena mustaqbalka. Anaga oo adeegsanayna wadasheekaysiyo qaabaysan iyo cunto wadaagis, waxa aanu ururinay aragtiyo qiimo leh waxana aanu xoojinay dareenka masuuliyadda la wadaago ee horumarka dugsiga. Waxa aanu ku darnay codadka in ka badan 50 waalid/ masuul, 24 arday, iyo 25 xubno shaqaale ah.

Waxa aanu baranay: Daneeyeyaasha Cottonwood waxa ay isku waafaqeen in qaar kamid ah awoodaheena badani ay ku jiraan himaladeena Goobeed, xajmiga fasalka ee yar, iyo dedaalka aynu u galayno cadaaladda bulsheed. Waxa aanu bartilmaameedsanaa inaanu kordhino u dhannaanshaha iyo guusha anaga oo dhaqangelinayna waxbarasho waalid oo dhamaystiran, wanaajinayna xidhiidhka, isla

markaana ku xidhmayna adeegyo taageero oo dhamaystiran. Waxa aanu sidoo kale baranay in xogteena Waxbarasheed ay iftiimiso baahi loo qabo sii waditaanka in la xidho gaabka Xisaabta, gaar ahaan ardaydeena aan caddaanka ahayn iyo kuwa wajahaya saboolnimada.

**Ivy:** Qiimeynta baahiyaha dugsigeena madaxa bannaan waxa uu salka ku hayaa nidaamyo xogtu-hagto oo loogu talagalay inay aqoonsadaan oo wax ka qabtaan baahiyaha gaarka ah ee bulshadeena ardayda. Qiimeynta waxa kamid ah kormeer sinnaan oo ay sameeyaan dhammaan xubnaha shaqaalaha, xog-ururin waalid oo dhamaystiran, iyo qiimeyno waxbarashada dhexdeeda iyo dhammaadka waxbarashada ah oo fasal oo kala duwan. Taas marka laga yimaaddo, aragtiyaha u kuurgaleed iyo xogta waxqabadka ee laga helay halbeegyada akhriska iyo xisaabta ayaa noo saamaxay in aanu xaddidno aagagga ardaydu, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda bulshooyinka la faquuqo ama heerka hooseeya, ay uga baahan yihiin taageero dheeraad ah.
Xogtu waxa ay iftiimisay gaabab ka jira guusha waxbarasheed, gaar ahaan dhanka akhriska iyo xisaabta, waxana ay hoosta ka xarriiqday ahmiyadda ay leedahay helitaanka khayraad iyo taageeero la jaanqaadaya dhaqanka ardayda oo loogu talagalay waxbarashada bulsho-shucuureed (SEL). Jawaab ahaan, waxa aanu miisaaniyad u qoondaynay iibsiga khayraadka waxdhigista kuwaan oo ka turjumaya taariikhaha dhaqan ee kala duwan, uga qaybgelinaya hawlaha ardayda si macno leh, isla markaana taageeraya wax ka qabashooyinka waxbarasheed. Qiimeyntu waxa ay sidoo kale qayb ka noqotay go'aanka lagu shaqaalaysiinayo shaqaale taageero oo dheeraad ah oo ka hawlgala xarunta waxbarashada oo hoggaamiya hindiseyaasha SEL isla markaana siiya tababar sinnaan dhammaan macallimiinta, taas oo xaqiijinaysa bay'ad la jaanqaadaysa dhaqanka ardayda.

Anaga oo ikhtiyaaradeena qorshaynta iyo miisaaniyad-sameynta ku salaynayna xogta, dugsigeenu waxa uu si wax ku ool ah u bartilmaameedsan karaa wax ka qabashooyinka, dardargelin karaa xarun waxbarasho oo ammaan ah, oo loo dhan yahay, isla markaana u xaqiijin karaa dhammaan ardaydu inay galaangal cadaalad ah u helaan khayraadka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan waxbarasho ahaan iyo bulsho ahaan.

**11. Idinka oo si dhamaystiran u eegaya hannaankiina Ka Qaybgelinta Hawlaha ee Bulshada, maxaad ka barateen bulshada iyo shaqaalaha? Sharrax sida aad ugu dabbaqdeen aragti dhiibashada hagitaanka qorshayntiina.**

Anaga oo u marayna hannaan ka qaybgelin hawleed oo dhamaystiran, oo ay kamid yihiin kooxo diirad-saarid, kulano, xog-ururino, iyo fadhiyo dhegaysi, waxa aanu baranay in hufnaanta, waadaxnimada go'aan-qaadashada, iyo mudnaan-siinta maalgelinada ardayda ahmiyadda siiya ay aad muhiim ugu yihiin bulshadeena iyo shaqaaleheena.

Qodob muhiim ah oo aanu baranay ayaa ahaa baahida loo qabo in si joogto ah loola xidhiidho oo xilli hore ah daneeyeyaasha si loo xaqiijiyo inay fahmeen xaqiiqooyinka miisaaniyadda isla markaana ay aragti macno leh dhiiban karaan. Waxa aanu sidoo kale qaadanay aragti heer nidaam ah si aanu si iskaashi leh ugu qorshayno khayraadka oo u qiimeyno saameynta dhimitaanada ee dhamayska tiran, anaga oo tixgelinayna khayraadka dugsiyeed, isbeddelada isdiiwaangelinta, xeerarka shaqaalaynta, maalgelinta Cinwaanka I, iyo lacag-isku-darista waalidka/mu'asasadda.

Ra'yi-celinta bulshadu waxa ay hoosta ka xarriiqday ahmiyadda ay leedahay sii haysashada shaqaalaha ardayda sida tooska ah ula macaamila iyo yareynta kala gu'itaanada soo food-saara waxbarashada fasalka. Anaga oo u marayna hannaan soo noqnoqda, keliya ma aannaan wanaajin waxa aanu dhinay,

balse sidoo kale waxa aanu wanaajinay sida dhimitaanadaasi u saameyn karaan dugsiyada. Fadhiyada dhegaysigu waxa ay gacan ka geysteen inay habraaca ka beddelaan dhimitaanada gaarka ah "line-item" ee adag oo ay u wareegaan wax ka beddelo ka dabacsanaan badan, oo istiraatiiji ah sida fasallo isku-dhafan iyo qorsheyaal khafiifin si loo yareeyo saameynada taban.

Tusaale ahaan, inkasta oo tababarka waxdhigiseed loo aqoonsaday in uu yahay maalgelin istiraatiijiyadeed, haddana waxa aanu u baahanay inaan ka helno dabacsanaan dhaqangelintiisa halkii aanu gebi ahaantiisaba meesha ka saari lahayn. Isku miisaamiddan u dhaxaysa taageerada waxdhigiseed ee aasaasiga ah iyo sameynta dhimitaanada miisaaniyadeed ee daruuriga ah waxa ay ahayd natiijo toos ah oo ka timid aragti dhiibashada bulshada iyo shaqaalaha. Anaga oo udub-dhexaad ka dhigayna codadka bulshada iyo shaqaalaha, waxa aanu xoojinay dedaalka aanu ugu jirno qorshaynta ku salaysan ra'yi-celinta, doodda furan, iyo mudnaan-siinta guusha ardayda anaga oo dhex mushaaxayna xanibaadaha dhaqaaleed.

## Nidaamyada iyo Awoodda La Xoojiyey

1. **Waa kee nidaamka aad leedihiin ee aad ugu talagasheen shaqaaleynta, kusoo darista dugsiga, iyo haysashada macallimiinta iyo hoggaamiyeyaasha tayada leh, oo ay kamid yihiin kuwa metela kooxaha diirad-saaridda ardayda?**

Yool aasaasi ah oo kamid ah Qorshaheena Istiraatiijiyadeed ayaa ah in aanu si qorshaysan u shaqaaleysiino, u horumarino, oo u taageerno shaqaale kala duwan. Dedaaladani hadda waa ay socdaan waxana kamid ah falanqaynta dhaqankeena, hannaanadeena, siyaasadaheena, iyo nidaamyadeena hadda; qoto dheeraynta fahankeena khibrada shaqaalaha hadda iyo ta heerka sare ah; iyo dhaqangelinta hannaano, habraacyo, iyo nidaamyo isla xisaabtan oo loo dhan yahay oo cadaalad ah. Isla markaas, waxa aanu si xikmad leh uga faa'iidaysanaynaa barnaamijyadeenii hore u jirey iyo horumarintii xirfadeed sida barnaamijyada dhabbayeyaasha mihnadeed ee Iskaa-U-Koboc "Grow-Your-Own", Hindisaha Tubta Ahmiyadda Siiya Cadaaladda Qowmiyadeed "Racial Equity-Centered Pipeline Initiative" (oo ah iskaashi aan la leenahay Wallace Foundation), habraac dhamaystiran oo loo maro waxbarashada xirfadeed ee macallinka, waxbarashada xirfadeed ee masuullada ee billaha ah, iyo tababarka/kormeerka macallimiinta cusub.

Marka laga yimaaddo maalgelinta shaqaalaha ee guud, waxa jirta baahi degdeg ah oo loo qabo in la shaqaalaysiiyo macallimiin aad caddaan ahayn, oo ay kamid yihiin shakhsiyaad laba-luuqadleyaal ah, kuwaas oo faa'iidooyin kala duwan ugu fadhiya ardayda, dugsiyada, iyo bulshada.
PPS waxa ay maalgelinaysaa shaqaalaysiinta iyo haysashada macallimiin kala duwan iyada oo diiradda saaraysa xeeladaha shaqaalaysiinta, gunnooyinka haysashada, iyo fursadaha waxbarashada xirfadeed ee la khaasyeelay ee loogu talagalay macallimiinta aan caddaanka ahayn iyo boosaska ay adag tahay in la buuxiyo kuwaas oo u adeega ardaydeena uga fogaanshaha badan cadaaladda waxbarasheed. Imika ahaan, waxa aanu xeeladaheena shaqaalaysiinta iyo haysashada macallimiinta aan caddaanka ahayn waafajinaynaa nidaamyada ugu wanaagsan ee qaranka waxana aanu abuuraynaa qaabdhismeed shaqaalaysiin oo la wadaago oo ay ku jiraan himilo, cabbiraado, iyo qorshe dhaqangelin oo sanadada mustaqbalka ah. Dhawaan waxa aanu qaybaha ku salaysan dan-wadaagta ku darnay waxbarashada iyo tababarka billaha ah waxana aanu siinay fursado waxbarasho xirfadeed oo la khaasyeelay

hoggaamiyeyaaha aan caddaanka ahayn iyo dhiggooda caddaanka ah oo ku saabsan waxbarashada nidaamyada hoggaaminta ee cadaaladda ku salaysan.

2. **Waa maxay nidaamyada idiin diyaarsan ee aad ku xaqiijinaysaain in ardayda diirad-saaridda ay wax baraan macallimiiin wax ku ool ah oo tayo sarreeya in lamid ah inta jeer ee ay wax baraan ardayda kale?**

Arday waliba waxa uu u qalmaa waxbarasho tayo-saraysa, oo cadaalad ah, ardayda diirad-saariddana, arrintani si gaar ah ayaa ay muhiim ugu tahay. Bulshooyinkeena waxbarashada xirfadeed (PLCs) iyo kooxaheena wax ka qabashooyinka ardaydu waxa ay kormeeraan isla markaana ay dhaqangeliyaan xeeladaha waxdhigista ee bartilmaameedsan. Waxa aanu u adeegsanaa Qaabdhismeedyada Waxdhigiseed ee Danielson iyo PPS qiimeynta tayada waxdhigista, anaga oo xaqiijinayna ra'yi-celin cayiman, la fulin karo, oo wakhtiga munaasab ku ah—gaar ahaan u adeegsanayna macallimiinta cusub ama kuwa aan waxtarka badan lahayn. Masuulladu waxa ay si joogto ah ugu kuurgalaan fasallada, u bixiyaan ra'yi-celin, oo u sameeyaan qiimeyno waafaqsan nidaamyada ugu wanaagsan iyo heshiisyada shaqaalaha.

Dugsi kastaa waxa uu leeyahay tababare waxdhigiseed oo horumarinta macallimiinta ku taageera PLCs, tababar mid-mid ah, iyo waxbarasho xirfadeed oo dugsiga ku salaysan. Nidaamkeena tababarku waxa uu xoojiyaa qorshaynta, dhaqangelinta, qiimeynta, iyo milicsiga. Waxa aanu farqiyada jira wax kaga qabanaa wax ka qabashooyin bartilmaameedsan, anaga oo qoondaynayna khubaro wax ka qabasho waxbarasheed oo ku salaysan xogta qiimeynta jaanta go'an. Kaabis waxbarasheed oo xaddi-sarraysa, saddex jeer toddobaadkii oo kooxo yaryar ah, ayaa waxa ay xoojisaa akhris-qoraalka aasaasiga ah iyo u diyaargarawga aljabrada ee dugsiyada mudnaanta leh.

Iyada oo waafaqsan heshiiskeena, waxa aanu leenahay habraac marxalado leh oo lagu horumarinayo laguna shaqaalaysiinayo macallimiin wax ku ool ah anaga oo si qoto dheer diiradda u saarayna sinnaanta oo isla markaana xaqiijinayna in ardayda diirad-saaridda lagu meeleeyo macallimiin wax ku ool ah. Waxa aanu sidoo kale leenahay khayraad dheeraad ah iyo kuwo kab ah, oo ay kamid yihiin tababareyaal iyo taageerooyin arday, oo ku diyaarsan dugsiyada Title I, TSI, iyo CSI. Waxa aanu adeegsanaa manhaj tayo-sarreeya, waxbarasho xirfadeed, iyo dib u eegisyo waxqabad si aanu u joogtayno heersarreyn waxdhigiseed. Macallimiinta cusub—kuwa sanadka koowaad illaa sanadka saddexaad iyo kuwa haysta liisano xaddidan—waxa ay hagitaan ka helaan laba iyo tobankeena Tababare ee Hagitaan-Gacanqabad. Tababareyaashani waxa ay bixiyaan faallooyin, ra'yi-celin, qorshayn-wadaag ah, tusaalayn, iyo waxdhigis-wadaag ah oo toddobaadle ah si ay uga taageeraan macallimiinta cusub gaadhsiinta waxdhigis tayo-saraysa ardaydooda.

3. **Sharrax nidaamkaaga falanqaynta gudbinada anshax-marineed, hakinta, iyo eryidda, oo ay kamid yihiin kala-soocidda macluumaadkan iyada oo loo eegayo kooxaha diirad-saaridda.**

PPS waxa ay aaminsan tahay in midkasta oo kamid ah ardaydeenu uu hibo leeyahay oo uu awoodo in uu waxbarto, kobco, oo guulaysto. Anaga oo tan ka duulayna, masuuliyaddeenu waa in aanu dhaqangelino siyaasado anshax-marin oo dardargeliya awoodda dhamayska tiran ee arday kasta. Xogteena anshax-marintu waxa ay muujisaa in ardayda Madawga ah, Kuwa Dhaladka ah ee Maraykanka Loogu Yimid, iyo ardayda kale ee aan caddaanka ahayn iyo sidoo kale ardayda waxbarashada gaarka ah si ka badan sida munaasabka ah loo anshax-mariyo. Dedaalka aanu ugu jirno falanqaynta xogta waxa kamid ah dib u eegisyo xog oo saddexdii biloodba mar ah oo kala soocan taas oo lala wadaago Hoggaamiyeyaasha Sare iyo masuullada dhismeyaasha. Dugsi waliba waxa uu leeyahay Koox Cimilo "Climate Team" oo masuul ka ah dib u eegista xogta habdhaqanka isla markaana u adeegsada xogtan inay ku hagaan qorsheyaashooda

cimilada dugsiga. Waaxda MTSS waxa ay sii waddaa inay bixiso waxbarasho iyo tababar xirfadeed si ay u ballaadhiso oo u qoto dheerayso nidaamyadan.

4. **Waa maxay nidaamyada idiin diyaarsan ee aad ku taageeraysaan ardayda iyo qoysaska ka wareegaya goobaha LTCT, YCEP yada, iyo JDEP yada, una wareegaya dugsiyada?**

In si dhaw oo joogto ah looga qaybgeliyo hawlaha qoysaska iyo ardayda oo ay dheer tahay shuraakooyinka gobol ee la is dhexgeliyey ayaa aasaasi u ah adeegyada ay bixiso Adeegyada Dib Ugu Xidhmidda PPS (RS). Marka arday loo gudbiyo RS, isuduwe wacyigelin ayaa arrinta loo xilsaaraa kaas oo wax dheeraad ah ka ogaada ardayga cayiman kaas oo markaas mara hannaanka macluumaad-ururinta qoyska. Hannaanka waxa kamid ah ikhtiyaaro taageero, isdiiwaangelin, iyo ku xidhmidda adeegyo dhamaystiran. Isuduweyaasha wacyigelintu waxa ay ku meelaysan yihiin dugsiyada waxana ay sii wadaan la shaqaynta arday walba illaa ay go'aamiyaan in ardaygu uu diyaar u yahay wareegitaan la taageero. U dhabar-adayga gaadhitaanka iyo u adeegga ardayda oo ay la socoto awood-saarid la joogteeyey oo xidhiidhada ah ayaa aasaasi u ah ka qaybgelinta hawlaha ee ardayda isla markaana daruuri u ah ardayga guulaysta.

Taas marka laga yimaaddo, Degmada Adeegga Waxbarashada ee Multnomah (MESD) waxa ay siisaa adeegyo waxbarasheed dhallinyarta ku jirta Xarunta Haynta Dhallinyarta aan Qaangaadhka ahayn ee Donald E. Long iyo sidoo kale labada xabsi ee Degmada Mulnomah. Waxa ay sidoo kale adeegyadan ka bixisaa dhawr degmo oo kale oo daafaha gobolka ah iyo saddex xarun asluubeed oo dhallinyarta ah oo ku yaalla gobolka, taas oo ka dhigan inay si dhaw ula shaqeeyaan dhallinyarta xidhan si ay uga caawiyaan inay ka kasbadaan saacado waxbarasho dhanka qallinjebinta, abuuraan qorsheyaal iyo baroofaylo waxbarasho, oo sameeyaan qorsheyaal dugsiga sare kadib ah. Iyada oo u maraysa dhawr deeqood, MESD waxa ay sidoo kale adeegyo wareegitaan oo la khaasyeelay siisaa dhallinyarta maxkamadaha ku jira, oo ay kamid yihiin kuwa hadda ama hore loo xidhay. Adeegyadan wareegitaanka ee dhamayska tirani waxa ay ku salaysan yihiin aragti-dhiibashada iyo baahiyaha ardayda ee joogtada ah.

Iyada oo u maraysa iskaashiyo ay la leedahay HOLLA iyo Dr. Danielle Dupuy, MESD waxa ay sidoo kale siisaa dhallinyarta goobo ay ku wadaagaan khibradahooga, iyada oo qayb ka ah tubta dugsiga-illaa-xabsiga, iyaga oo la wadaagaya macallimiin iyo khubaro garsoor oo ku sugan munaasabadaha waxbarashada xirfdeed sida taxanaha Building Bridges to Equity iyo Reflections on Pushout, oo ah filin dukumenteri ah.

5. **Sidee baad u taageertaan ardayda iyo qoysaska ku jira u kala wareegga barnaamijyada waxbarashada carruurnimada hore iyo barnaamijyada dugsiga hoose ee maxalliga ah ee fasallada hoose illaa dhexe? Fasallada dugsiga dhexe illaa dugsiga sare? Dugsiga sare illaa waxbarashada dugsiga sare kadib iyo/ama shaqada?**

Qorshaynta kala wareegyadan, waxa aanu udub dhexaad ka dhignaa ardayda iyo khibradahooga. Tiir-dhexaadka kala wareegga guulaystaa waa siinta ardayda fursado ay ku sahamiyaan aaggooda waxbarasheed ee mustaqbalka. Waxa aanu leenahay is waafajin isku xidhan oo adag oo aanu ka dhaxaysiino aagagga waxbarashada ee hada ee ardayda iyo aagagga ay geli doonaan. Taas waxa kamid ah xaqiijinta in shaqaaluhu wada xidhiidhayaan oo wada shaqaynayaan.

**PK illaa K:** Anaga oo raacayna mabaadi'dan guud, qodobo gaar ah baa aanu u samaynay kala wareeg kasta. Sida aanu hore u sheegnay: Golaheena Rawdada-Kahor illaa fasalka saddexaad ayaa waxa uu naga

caawiyaa falanqaynta iyo wanaajinta u wareegitaanka ardayda ee rawdada. Hawlaha kala wareegidda ee rawdada waxa kamid ah is-diiwaangelinta, shaqaalaynta, iyo munaasabadaha buundooyinka xagaaga "summer bridge".

**DH illaa DDH:** Dugsiyadeena dhexe waxa ay soo dhaweeyaan ardayda cusub ee fasalka 6 aad-keliya maalinta koowaad ee dugsiga. Tani waxa ay fursad u siisaa ardayda soo galaysa fasalka 6aad inay la kulmaan macallimiinta iyo shaqaalaha dugsiga, wax dheeraad ah ka bartaan fasalladooda, oo dhex mushaaxaan dugsigooda cusub. Xaaladaha intooda ugu badan, arday fasalka-8aad ah ayaa hoggaamiya kooxo yaryar oo ardayda fasalka-6aad ah si ay u siiyaan faca ay waxoogaa ka weyn yihiin hagitaan maalinta koowaad ee dugsiga iyo wixii ka dambeeya.

**DD illaa DS:** Kooxaheena Guusha Ardayda Fasalka-8aad ayaa waxa ay fudaydiyaan u kala wareegitaan fasalka-8aad iyo dugsiga sare ah oo guul leh. Kooxo heer goobeed ah ayaa taageera ardayda iyaga oo ka caawinaya saadaasha, hannaanka iktiyaarada dugsiga sare, iyo cashararrada bulsho-shucruureed. Dhammaan ardayda fasalka-9aad ayaa qayb ka ah Kooxaha Guusha Ardayda, kuwaas oo ka kooban bulshooyin ama akaadeemiyado. Koox kastaaba waxa ku jira ugu yaraan saddex macallin oo maaddooyin badan dhiga kuwaas oo wadaaga wakhti fasax oo isku mid ah si ay dib ugu eegaan xogta ardayga oo uga wada hadlaan taageerooyinka iyo xeeladaha waxdhigiseed.

Leap into 9th Grade, oo ah barnaamij buundo xagaa ah, ayaa waxa uu u diyaariyaa ardayda inay ku fiicnaadaan dugsiga sare oo ay wakhti bilaw oo hore u helaan la shaqaynta macallimiinta iyo faca cusub xagaaga muddo saddex toddobaad ah. Barnaamiju waxa uu ogol yahay qaabab badan oo aqoon-korodhsiga ah waxana uu qiraa aqoonta hore loo sii haysto. Barnaamijku waxa uu bixiyaa khibrado waxbarasho oo la khaasyeelay, ardayduna waxa ay kasbadaan saacado waxbarasho doorasheed oo dugsiga sare ah oo 0.5 ah marka ay si guul leh u dhamaystaan. Dhammaan dugsiyada sare waxa ay sidoo kale bixiyaan Bulshooyinka Fasalka 9aad taas oo xaqiijisa in ardayda fasalka 9aad ay aqoonsadaan oo ay taageeraan macallimiintoodu.

**DS illaa Dugsiga Sare-kadib:** La-taliyeyaasha Dugsiyada Sare, Isuduweyaasha Kulliyadda, iyo Isuduweyaasha Mihnadeed ayaa waxa ay ka taageeraan ardayda samaysashada qorsheyaal dugsiga sare-kadib ah. Waxa aanu sidoo kale iska kaashanaa Kuliyadda Bulshada Portland martigelinta barnaamijka buundada "bridge program" si aanu u yareyno ka noqoshada ardayda qallinjebiyeyaasha ah ee xagaaga "summer melt" kuwaas oo qorshaynaya inay xaadiraan PCC dayrta.

6. **Waa maxay koorsooyinka iyo nashaadaadka sahaminta mihnadeed iyo kuwa horumarinta mihnadeed ee la bixiyo si loogu taageero wacyigelinta, sahaminta, diyaargarawga, iyo tababarka heerarka-fasallada ee kala duwan? Waxa aad sharraxdaan nidaamkiina aad kula wadaagtaan ardayda iyo waalidiinta macluumaadka la xidhiidha fursadaha waxbarashada ku xidhan mihnadde iyo CTE ga, oo ay kamid yihiin wixii ah hagitaan, la-talin, iyo ku xidhitaano qorsheyaasha iyo baroofaylada waxbarasheed ah.**

Dhammaan Ardayda PPS ee ku jira fasallada 6-12 waxa ay fursad u helaan inay dhamaystiraan Qorshe iyo Baroofayl Waxbarasheed taas oo siisa nashaadaad iyo khibrado kala duwan oo loogu talagalay in ardayda lagu hago ka fekerka waxyaabaha ay xiiseeyaan, awoodahooga, iyo qorhseyaashooda dugsiga sare-kadib. Sawirka-jaantuseed ee Qorshaha iyo Baroofaylka Waxbarasheed ee PPS waxa uu soo bandhigaa qaybaha ay ardaydu ku dhamaystiri doonaan hadba heerka fasal ee ay yihiin. Heerka dugsiga

sare nashaadaadka waxa la geliyaa Maia Learning waalidiintuna waxa ay galaangal u leeyihiin inay arkaan natiijooyinka iyo horumarka ardaygooda dhammaan inta ay ku jiraan dugsiga sare.

Iyada oo ku xidhan CTE ga, waxa jira sahamin iyo diyaargaraw mihnadeed oo qoto dheer oo loo maro koorsooyin CTE ah, khibrado waxbarasho shaqeed, iyo iskaashiyo warshadeed. Ardaydu waxa ay ka qaybqaataan barnaamijyo shaqo-fiirsasho, shaqo-barasho, hagitaan, iyo shahaadooyin ay warshaduhu aqoonsan yihiin. Iskaashiyada aan la leenahay Isbahaysiga Shaqaalaha Portland iyo Boedecker Foundation waxa ay ballaadhiyaan waxbarashada ku xidhan mihnadde ee shaqooyin badan. PPS waxa ay samaysay qorshe suuqayn dhamaystiran oo ay kula wadaagayso qaar badan oo kamid ah fursadahan ardayda waxana ay si firfircoon uga shaqaynaysaa horumarinta boortalka ay adeegsadaan ardaydu halkaas oo dhammaan fursadaha waxbashada ku xidhan mihnadda lasoo dhigi doono. Kooxdu waxa ay siinayaan tababar dheeraad ah la-taliyeyaasha la xidhiidha CTE ga waxana ay sii wadaan inay si toos ah uga la shaqeeyaan isuduweyaasha mihnadeed ee dugsi kasta bixinta fursadaha waxbarashada ku xidhan mihnadda. Waxa aanu sidoo kale sii wadnaa inaanu si toos ah uga la shaqayno shuraakooyinka warshadeed fursado siinta ardayda, anaga oo u marayna munaasabado diiradda lagu saarayo mihnadaha, iyo fursado loogu talagalay martida ka khudbaysa dugsiyada labadaba.

7. ***Degmooyinka u baahan in laga qaybgeliyo La-talinta Qabiileed keliya:* Waxa aad sharraxdaan fursadaha horumarinta xirfadeed ee aad bixisaan si aad u xaqiijisaan in macallimiinta iyo xirfadleyaasha dugsiyada ee kale ee ku cusub bulshada Hindida ahi ay u diyaarsan yihiin inay la shaqeeyaan carruurta Hindida ah iyo in dhammaan macallimiinta ka qaybqaadan doona barnaamijyadan sida uu dhigayo hagitaankani si habboon loogu tababaray ka hawlgelidda barnaamijyadaas.**

Hindisaha Dhaqanka gudaha Fasalka ee degmadu waxa uu ku qalabeeyaa macallimiinta xeelado gaar u ah dhaqan si bay'ad soo dhaweyn leh loogu abuuro ardayda Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid. Shaqada waxa kamid ah Gole Hagitaan oo ka kooban xubno ka tirsan bulshada Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid. Waxyaabaha la qabanayo waxa kamid ah "waxyaabaha la eegayo - Look fors" ee macallimiinta iyo ardayda labadaba. Waxa aanu sidoo kale heshiis la galnay Dib U Eegista Qoraallada Cilmibaadhiseed "Literature Review" taas oo diiradda saarta guusha ardayga Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid.

Macallimiintu waxa ay helaan taageero manhaj iyo waxdhigiseed si ay qorshe cashareedyada Taariikhda Qabiileed/Taariikhda La Wadaago u dhex geliyaan khayraadka u go'an ee laga heli karo internet ka. Fasallada 6-8, hagitaanada dejinta xawaaraha waxa ay si cad uga kooban yihiin casharada SB13, waxana la qorshaynayaa safar waxbarasho oo ardayda fasalka-8aad ay ku tagayaan dhaamka Webiga Columbia iyada oo lala kaashanayo Waaxda Waxbarasada Hindida iyo Guddiga Kalluumaysiga Qabiilooyinka Wadajirka ah ee Webiga Columbia. Khayraadka manhajeed ee ELA iyo Cilmiga Bulshada, Taariikhda Qabiileed/Taariikhda La Wadaago ee K-5 oo ay la socdaan casharro ayaa diyaar u ah dhammaan macallimiinta, waxana lagu dhiirrigeliyaa macallimiinta inay ardayda baraan casharradan. Shaqo dheeraad ah ayaa socota si loo sameeyo u kuurgallo fasal isla markaana loo bixiyo ra'yi-celin. Macallimiinta dugsiyada sare sidoo kale waxa ay galaangal u leeyihiin qorshe cashareedyada la xidhiidha manhajka oo uu la socdo hagitaanka lagu dhexgelinayo maadooyinka aasaasiga ah sanadka oo dhan. Agaasimaha Akaadeemiyadeed ee Waxbarashada Hindidu waa xubin hadda ka tirsan koox la-talin oo samaynaysa casharro SB13 ah oo cusub oo dhawaan diyaar u noqon doona gobolka oo dhan. Waxa lagu hagi doonaa maamulka dugsiga iyo shaqaalaha tababarka waxdhigiseed.

Taas marka laga yimaaddo, maamuleyaashu waxa ay qodobada muhiimka ah ee waxdhigiseed ee SB13 ku heli doonaan wargeysyada iyo kulannada. Koox PreK-12 ah ayaa samaynaya Agab Waxa La Doonayo ah "Look For Tool" iyo dukuminti Baaxad iyo Isku-xigxigitaan si ay u xaqiijiyaan dhexgelinta wax ku oolka ah ee aragtiyaha Dadka Dhaladka ah ee Dhulka Loogu Yimid dhammaan fasallada.

## Khayraadka iyo Mudnaansiinta Akhris-qoraalka Hore

**Iyada oo ujeedooyinkeenu yihiin mudnaansiinta lacagaha Akhris-qoraalka Hore, waxa aanu adeegsanay khayraad xog oo badan, oo ay kamid yihiin balse aan ku xaddidneyn xogta qiimeynta dhammaadka waxbarashada ee Farshaxanka Luuqadda ee gobolka iyo, wixii ah codsadeyaasha u qalma ee u adeega Barteyaasha Luuqadda Ingiriisida, xogta Qiimeynta Wanaajinta Luuqada Ingiriisida.**

1. **Adiga oo adeegsanaya linkiga Xaashida "Smartsheet", wixii isbedello ah ee daruuri ah ku samee Khayraadkaaga Akhris-qoraalka Hore ee aad hore usoo gudbisay. Fadlan ogsoonow in khayraadka akhris-qoraalku u baahan yahay macluumaadkii u dambeeyey ee dhammaan qiimeynada, agabyada, manhajyada, iyo khayraadka dijitaal ee akhris-qoraalka ee loo adeegsaday in lagu taageero akhris-qoraalka fasallada dugsiga hoose ee hore (PK-3). *Wax jawaab sharraxaad ah looma baahna.***

Eeg lifaaqyada codsiga si aad u aragto xaashiyaha Khayraadka Akhris-qoraalka Hore ee degmada iyo kuwa dugsiga madaxa bannaan.

2. **Waa maxay magaca isha maalgelinta ee saamiga 25% ee akhris-qoraalka hore? (calaamadi dhammaan inta habboon)**
   Sanduuqa Guud
   Akownka Maalgelinta Ardayga (SIA)
   Sanduuqa Dugsiga ee Gobolka SSF
   Cinwaanka I
   Cinwaanka II
   Cinwaanka III
   Cinwaanka IV
   Ma aha Munaasab (wax ka yar 50 ADMw, looma baahna is-waafaqsanaan)
   Waxkale

3. **Haddii aad kaga jawaabtay "Waxkale" #2, fadlan ku sharrax hoos:**
   Ma aha Munaasab

4. **Fadlan isku day intii karraankaaga ah inaad calaamadiso qaybaha soo socda kuwa sida ugu wanaagsan u sharxaya sida aad u adeegsato lacagahaaga saamiyeed "matching funds"? (calaamadi dhammaan inta habboon)**
   Shaqaalaysiinta
   Iibsiga Manhajyada & Khayraadka
   Kaabista Waxbarasheed ee Xaddiga-Sarraysa
   Barnaamijyada Waxbarashada La Kordhiyey

Horumarinta & Tababarka Xirfadeed
Ujeedooyin kale

5. **Haddii aad kaga jawaabtay "Waxkale" #3, fadlan ku sharrax hoos:**
Ma aha Munaasab

6. **Dooro mid ama wax ka badan oo kamid ah sifooyinka dugsiyada ee soo socda ee loo adeegsan jiray in mudnaanta lagu kala siiyo Lacagaha Akhris-qoraalka Hore ee degmadaada dhexdeeda. Mudnaansiinta waxa la go'aamiyaa iyada oo lagu salaynayo dugsiyada:**
   - Leh qiimaynada ugu hooseeya ee ku wanaagsanaanta akhris-qoraalka ee dugsiyada hoose ee degmada;
   - La aqoonsaday inay u baahan yihiin taageero iyo horumarin dhamaystirna ama u baahan yihiin taageero iyo horumarin bartilmaameedsan oo hoos yimaadda Xeerka Guusha Arday Walba ee federaalka (P.L. 114-95, 129 Stat. 1802) iyada oo lagu salaynayo qayb ahaan dhibcaha akhris-qoraalka;
   - Leh qiimeynada ku wanaagsanaanta akhris-qoraalka ee aan dib ugu noqon heerarkii ay ahaayeen safmarka-kahor;
   - Leh saami kooxaha ardayda ah ee taariikh ahaan farqiyo waxbarasheed wajahay oo ka sarreeya marka loo eego dugsiyada hoose ee kale ee degmada.
   - Ma aha Munaasab haddii aad leedihiin keliya hal dugsi oo hoose

7. **Liis garee dugsiyada hoose (iyo/ama dugsiyada u adeega fasallada dugsiyada hoose) ee qaata Lacagaha Akhris-qoraalka Hore ama khayraadka, iyo celceliska boqolleyda ee lacagaha ee uu helayo dugsi waliba. Adeegso Qaabka [Dugsiga - xx%]. {qor Ma aha Munaasab haddii aad keliya leedihiin hal dugsi oo hoose}**

| | |
|---|---|
| PreK | 5 |
| Abernethy E.S. | 1.5 |
| Access | 1.5 |
| Ainsworth E.S. | 1.5 |
| Alameda E.S. | 1.5 |
| Arleta E.S. | 2 |
| Astor K-8 | 2 |
| Atkinson E.S. | 2 |
| Beach E.S. | 2 |
| Beverly Cleary K-8 | 1.5 |
| Boise-Eliot/Humboldt | 2 |
| Bridger Creative Science E.S. | 1.5 |
| Bridlemile E.S. | 1.5 |
| Buckman | 2 |
| Capitol Hill E.S. | 1.5 |

| | |
|---|---|
| Cesar Chavez K-8 | 3 |
| Chapman E.S. | 2 |
| Chief Joseph ES | 2 |
| Clark E.S. | 2 |
| Creston E.S. | 1.5 |
| Dr. Martin Luther King Jr. E.S. | 1.5 |
| Duniway E.S. | 1.5 |
| Faubion PK-8 | 2 |
| Forest Park E.S. | 1,5 |
| Glencoe E.S. | 1.5 |
| Grout E.S. | 1.5 |
| Hayhurst E.S. | 1.5 |
| Irvington E.S. | 2 |
| James John E.S. | 2 |
| Kelly E.S. | 1.5 |
| Laurelhurst K-8 | 1.5 |
| Lee E.S. | 1.5 |
| Lent | 1.5 |
| Lewis E.S. | 1.5 |
| Llewellyn E.S. | 1.5 |
| Maplewood E.S. | 1.5 |
| Markham | 1.5 |
| Marysville E.S. | 2 |
| Peninsula E.S. | 2 |
| Richmond E.S. | 1.5 |
| Rieke E.S. | 1.5 |
| Rigler E.S | 1.5 |
| Rosa Parks E.S. | 2 |
| Rose City Park E.S. | 1.5 |
| Sabin E.S. | 2 |
| Scott E.S. | 2 |
| Sitton E.S. | 1.5 |
| Skyline K-8 | 1.5 |
| Stephenson E.S. | 1.5 |
| Sunnyside Environmental K-8 | 1.5 |
| Vernon K-8 | 2 |

| | |
|---|---|
| Vestal E.S. | 2 |
| Whitman E.S. | 1.5 |
| Winterhaven K-8 | 1.5 |
| Woodlawn E.S. | 1.5 |
| Woodmere E.S. | 2 |
| Woodstock E.S. | 1.5 |

ODE waxa ay lacagaha deeqda Akhris-qoraalka Hore si toos ah ugu dirtaa dugsiyada madaxa bannaan. Ma jiraan wax degmada loo sii dhex mariyaa. Su'aashu ma khusayso dugsiyada madaxa bannaan.

## Ra'yi-celin

1. **Sidee baa ay ODE u taageeri kartaa hannaankaaga horumarinta joogtada ah?**

Hagitaanada iyo khayraadka ODE waxa ay si toos ah u saameeyaan awooddeena u adeegidda ardayda. Kharashaadka kor u kacaya, oo ay kamid yihiin sicir-bararka, magdhawga shaqaalaha, iyo waajibaadka hawlgabka, ayaa weli caqabad ku ah miisaaniyaddeena, iyada oo maalgelinta gobolku weli aanay nagu filneyn. Waayitaanka kaalmadii safmarka ee federaalka ayaa sii yaraysay khayraadkii la heli karayey, taas oo sii adkaysay daboolidda baahiyaha ardayda.

Isla markaas, ODE waxa ay sii waddaa ballaadhinta barnaamijyada iyo shuruudaha u hoggaansanka. Iyada oo ay jiraan lacagaha la kordhiyey, haddana culayska maamul ee kordhaya ayaa xaddidaya awooddeena diirad saaridda horumarinada ugu muhiimsan, ee ardayda ahmiyadda siiya. Iyada oo shaqaale yari jirto, haddana tani waa shaqo u baahan wakhti iyo khayraad labadaba. Waa in si wax ku ool ah mudnaan loo kala siiyaa.

Barnaamijyada xagaagu si laxaad leh baa ay isku dhimeen sababo la xidhiidha caqabado maalgelineed awgood. Anaga oo hore ugu adeegi jirnay 2,200 oo arday oo ku kala baahsan 67 dugsi oo ku yaalla 11 goobood, hadda keliya waxa aanu taageeri karnaa 700 oo arday oo dhigta 16 dugsi oo ku kala baahsan 4 goobood. Iyada oo ay jirto aqoonsiga qaranka ee Akaadeemiyadda Dedejinta Xagaaga "Summer Acceleration Academy", haddana waa la naga reebay xeerka maalgelinta ODE, taas oo si aan caddaalad ahayn u saamaynaysa bulshooyinka ardayda diirad-saaridda.

Saddexdii sano ee lasoo dhaafay, waxa aanu samaynay miisaaniyad dhimid ah ku dhawaad $105M, iyada oo gobolku soo kordhinayo barnaamijyo iyo shuruudo u hoggaansan, taas oo culays ku sii kordhinaysa khayraadka. Culaysyada codsiga iyo warbixinta ee xad-dhaafka ahi waxa ay wakhti ka cunayaan xeeladaha waxtarka leh.

Si ay dhab ahaan ugu taageerto horumarinta joogtada ah, Oregon waa inay si buuxda u maalgelisaa Qorshaha Waxbarashada Tayada Leh (QEM) ODE guna waa inay fudaydiso shuruudaha u hoggaansanka. Maalgelinta la kordhiyey oo keli ahi kuma filna—yareynta culaysyada maamul iyo xog ururinta oo la waafajiyo cabbiraado sax ah, oo cilmibaadhis-ku-

salaysan ayaa u saamixi doonta degmooyinka inay diiradda saaraan waxa ugu muhiimsan: horumarinta natiijooyinka ardayda.

## Sookoobidda Qorshaha

1. **Guudmar ka bixi qorshaha adiga oo faahfaahinaya qaybaha muhiimka ah iyo sababaha ka dambeeya habraaca la doortay. Sharrax himilada qorshaha iyo sida uu wax uga qabanayo awoodaha iyo aagagga looga baahan yahay kobcinta ee lagu aqoonsaday qiimeynta baahiyaha, oo ay kamid yihiin kuwa la xidhiidha CTE ga. Taas marka laga yimaaddo, sharrax sida qorshuhu uu uga hawlgeli doono wax ka qabashada LPGT yada ama Cabbiraadaha Ikhtiyaariga ah ee Maxalliga ah "Local Optional Metrics" ee sida wadajirka ah loo sameeyey. (500 oo eray ama ka yar)**
   ***Shardi dheeraad ah haddii la codsanayo dugsi madax bannaan oo la kafaalo-qaaday:* Fadlan hubi inaad ku darto macluumaadka ku saabsan sida qiimeynta baahiyuhu ay qayb uga ahayd qorshaha dugsi madax bannaan oo kasta haddii habraacu uu ka duwan yahay qorshe degmeedka ama sida dugsiga madaxa bannaan uu uga qaybqaatay qorshaynta iyo horumarinta qorshe degmeedkaaga. (250 eray oo dheeraad ah ama ka yar)**

Maalgelinada deequhu waxa ay qoto dheereeyaan oo ay ballaadhiyaan shaqadeena ah joojinta sinnaan-la'aanta, waxa ay xoojiyaan iskaashiyada iyo wadashaqaynta, waxana ay bixiyaan fursado waxbarasho oo loo dhan yahay oo kala duwan. Iyaga oo waafaqsan qorshaha iyo Khariidad-waddeedka horumarinta joogtada ah ee Sinnaanta Waxbarasheed ee degmadeena, maalgelinadani waxa ay si toos ah u taageeri doonaan dedaalka aanu ugu jirno siinta dhammaan ardayda waxdhigis iyo waxbarasho tayo-saraysa oo fasal kasta ah.

Qorsheheena la is dhexgeliyey waxa uu mudnaanta siiyaa maalgelinada ku salaysan baahiyaha la aqoonsaday, isaga oo diiradda saaraya dardargelinta khibradaha waxbarasho ee loo dhan yahay ee farxadda leh taas oo xaqiijisa in dhammaan ardaydu—gaar ahaan kooxaha ardayda diirad-saaridda—ay galaangal u leeyihiin khayraadka iyo taageerooyinka ay u baahan yihiin si ay usoo bandhigaan heersarreyn. Mudnaanahani waxa ay waafaqsan yihiin qiimeynteena baahiyaha iyo ra'yi-celinta bulshada, iyaga oo xoojinaya:

- **Guusha Akhris-qoraalka Hore**: Xoojinta waxdhigista akhriska iyo qoraalka ee PK-3 iyada oo loo marayo khayraad tayo-sarreeya, oo waafaqsan heerarka, wax ka qabashooyin bartilmaameedsan, iyo waxbarasho xirfadeed oo la siiyo macallimiinta si loo taageero horumarinta akhris-qoraalka.
- **Guusha Waxbarasheed ee K-12**: Ballaadhinta galaangalka loo helayo khayraadka iyo xeeladaha waxdhigiseed ee tayada-sarreeya, waxbarasho xirfadeed oo macno leh oo la siiyo macallimiinta, iyo taageerooyin wax ka qabashooyin bartilmaameedsan si loo dedejiyo waxbarashada ardayda ay ku adag yihiin casharrada heerka-fasal ah.
- **Xaadiritaanka iyo Ka Qaybqaadashada**: Kordhinta qiimeynada xaadiritaanka iyada oo la xoojinayo dareenka ka mid ahaanshaha isla markaana la wanaajinayo cimilada dugsiga.
- **Diyaargarawga Qallinjebinta iyo Dugsiga Sare Kadib**: Xoojinta waxdhigista, nidaamyada dhibco-siinta ee cadaaladda ah, barnaamijyada la xidhiidha mihnadda ee xoojiya waxbarasho la

jaanqaadaysa dunida dhabta ah, oo camali ah, iyo bixinta ikhtiyaarada iska soo guditaanka saacadaha waxbarasheed.

- **Dugsiyo Ammaan ah oo Taageero Leh**: Ballaadhinta galaangalka loo helayo taageerooyinka habdhaqan, caafimaadka maskaxeed, iyo badqab, iyada oo la dhaqangelinayo siyaasado iyo nidaamyo lagu xaqiijnayo bay'ad dugsiyeed oo ka madhan takoor, dhibaatayn, gardarraysi iyo aargoosi.
- **Dhaqanka Sinnaanta Qowmiyadeed & Daryeelka**: Kasbashada sinnaan qowmiyadeed iyo daryeel iyada oo loo marayo ka qaybgelinta hawlaha ee macnaha leh ee ardayda, qoysaska, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada, iyo dhaqangelinta xeelado la jaanqaadaya dhaqanka ardayda oo laga hirgeliyo dhammaan dugsiyada iyo waaxaha.

Qorshahani waa qayb muhiim ah oo kamid ah dedaalada istiraatiijiyadeed ee ballaadhan ee degmadeena, kuwaas oo waafaqsan yoolasha Guddiga PPS iyo LPGT yada ODE da. Waxa aanu dabagal ku sameyn doonaa oo aanu ka warbixin doonaa tilmaameyaasha muhiimka ah saddexdii biloodba mar si loo sameeyo dib u eegis gudeed sanadkiiba marna waa aanu sameyn doonaa si loogu gudbiyo Guddiga iyo bulshada. Taas marka laga yimaaddo, waxa aanu bixin doonaa cusboonaysiino gaar ah oo muddadiiba mar ah oo ku saabsan maalgelinadan sida uu waajibinayo Hagitaanka La Is-dhexgeliyey ee ODE

**Sookoobidda Qorshaha Dugsiga Madaxa Bannaan**

Iyada oo waafaqsan xeeladaha Qorshaha La Is-dhexgeilyey ee degmada, qiimeynta baahiyaha ee dhamayska tiran ee hal dugsi oo madax bannaani waxa uu qayb ka ahaa qaabaynta qorshaha dugsi madax bannaan oo kasta, iyada oo la xoojinayo habraacyo kala duwan oo lagu jaangooyey ardayda dhigata dugsi kasta. Hannaanka qiimeynta baahiyuhu waxa uu adeegsaday aragti sinnnaan si dib loogu eego xeeladaha ka qaybgelinta hawleed ee dugsi madax bannaan oo kastaa gaarkiisa u dhaqangeliyey. Dugsi madax bannaan oo kastaa waxa uu samaystay qorshe gaar ah oo uu wax kaga qabanayo baahiyaha ardaydiisa.

Qorshaha dugsi madax bannaan oo kastaa waxa uu tibaaxayaa aagagga muhiimka ah ee u baahan kobcinta iyo maalgelinta, sida ku taxan hoos.

The Emerson School:

- Isgaadhsiin La Wanaajiyey iyo Ka Qaybgelinta Hawlaha ee Qoysaska
- Taageero Waxbarasheed oo La Jaangooyey
- Badqab ardayda ah oo dhamaystiran

Le Monde French Immersion:

- Filashooyin Sarreeya oo Adag
- Babqadka Bulsheed, Shucuureed, iyo Jidheed ee ardayda

Portland Arthur Academy:

- Kooxo waxdhigiseed oo kookooban oo diiradda saara ELA iyo Xisaabta
- U abuuridda dhaqan ammaan iyo ixtiraam ardayda

Portland Village School:

- Filashooyin Sarreeya oo Adag
- Babqadka Bulsheed, Shucuureed, iyo Jidheed ee ardayda

The Ivy School:

- Filashooyin Sarreeya oo Adag
- Bay'ad la jaanqaadaysa dhaqanka ardayda
- Babqadka Bulsheed, Shucuureed, iyo Jidheed ee ardayda

The Cottonwood School:

- Isgaadhsiin la wanaajiyey oo ay kamid tahay waxbaridda waalidka, cusboonaysiino lagu sameeyo madalaha isgaadhsiinta, iwm…
- Adeegyo dhamaystiran oo wax ka qabanaya baahiyaha dhamayska tiran ee ardayda (bulsheed, shucuureed, iyo jidheed)

## Xaqiijino

Waxa aad u hoggaansami doontaa dhammaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka iyo federaalka, halkaas oo aan qofna laga reebi doonin ka qaybqaadashada, loo diidi doonin faa'iidooyinka, ama si kale loogu la kici karin takoor hoos yimaadda wax barnaamij ama hawl ah iyada oo lagu salaynayo qowmiyad, midab, qaranka uu qofku kasoo jeedo, jinsi, doorasho jinsiyeed, xaalad guur, aqoonsi jinsiyeed, diin, da', ama naafanimo.
Waxa aad tixgelisay Guddiga Waxbarashada Tayada Leh (QEC).
Kharashaadka aad soo jeedisay waxa ay waafaqsan yihiin hagitaanka kabka (ma aha beddelka) ee ku tibaaxan sharciga Horumarinta Dugsiga Federaalka, Perkins, hawlaha degmada/dugsiga ee HSS (haddii ay munaasab tahay).
Xogta horumarka iyo natiijada ardaygaaga oo loo kala saaray kooxaha ardayda diirad-saaridda (marka laga reebo xaaladaha ay ka yar yihiin 10 arday) ayaa la baadhay intii lagu gudo jiray hannaanka qorshaynta la is-dhexgeliyey.
Xeeladaha iyo hawlaha ka hortagga in ardaygu uu ka baxo/lagu kelifo in uu ka baxo dugsiga ayaa lagu dabbaqay dugsi kasta oo ku yaalla degmada, oo ay kamid yihiin dugsiyada beddelka ah.
Midkasta oo kamid ah qorsheyaasha SSA ayaa dib loo eegay iyada oo qayb ka ah qorshayntaada istiraatiijiyadeed.
Waxa aad dib u eegtay barnaamijyadaada akhris-qoraalka hore si aad u aqoonsato aagagga waafaqsan Qaabdhismeedka Akhris-qoraalka Hore ee Oregon: Mu'asasad Xooggan oo loogu talagalay Akhristeyaasha iyo Qoraayada (K-5) shaqada codsaduhuna waxa ay waafaqsanaan doontaa qeexitaanada ku jira Hindisaha Guusha Akhris-qoraalka Hore.
Qiimeynadaada, agabkaaga, manhajyadaada iyo khayraadkaaga dijitaalka ah ee akhris-qoraalka waa kuwo la jaanqaadaya dhaqanka ardayda, waafaqsan cilmibaadhista, oo ka muuqda khayraadka, oo ay kamid yihiin agabka qiimeynta waxbarashada dhexdeeda iyo agabka qiimeynta faahfaahsan.
Waxa aad horumarin iyo tababar xirfadeed oo ku saabsan xeeladaha akhris-qoraalka ee waafaqsan cilmibaadhista siin doontaa macallimiinta iyo masuullada ka hawlgala fasallada dugsiyada hoose ee hore si loo horumariyo waxdhigista akhris-qoraalka hore.
Waxa aad barnaamijyo waxbarasho oo korodhsan oo adeegsada xeeladaha akhris-qoraalka ee waafaqsan cilmibaadhista siisaa ardayda ku jirta fasallada dugsiyada hoose ee hore oo ay siinayaan macallimiin liisan haysta ama bareyaal kaabiseed oo khibrad leh.
Waxa aad kaabis waxbarasho oo xaddi-sarraysa siin doontaa ardayda ku jira fasallada dugsiyada hoose ee hore taas oo is-dhexgelisa akhriska iyo qoraalka oo ay siinayaan bareyaal kaabis oo khibrad leh oo adeegsanaya nidaamyo korniinka ku habboon.
Waxa aad leedahay qiimeyn koboc arday oo akhris-qoraalka ah kaas oo soo saara xog loo kala saari karo kooxaha arayda diirad-saaridda.

Haddii lacagaha akhris-qoraalka loo adeegsado in lagu shaqaalaysiiyo xirfadleyaal khubaro ah, xirfadleyaal wax ka qabasho, ama tababareyaal, waa inay haystaan shahaado ogolaansho diiradda saaraysa akhris-qoraalka, waa inay tababar iyo shahaado sare ka haystaan "xeeladaha akhris-qoraalka ee waafaqsan cilmi-baadhista" iyo "cilmiga akhrista iyo qoraalka", doorkooda iyo masuuliyadahooga aasaasiga ahna waxa kamid ah taageero toos ah oo la siiyo ardayda iyo/ama macallimiinta.
Waxa aad, iyada oo ujeedooyinku yihiin mudnaan kala siin, go'aamisay qiimeynada ku wanaagsanaanta adiga oo adeegsanaya khayraad badan oo xogeed, oo ay kamid yihiin xogta qiimeynta dhammaadka waxbarashada ee Farshaxanka Luuqadda ee gobolka, wixii ah codsadeyaasha u qalma ee u adeega Barteyaasha Luuqadda Ingiriisida na, xogta Qiimeynta Ku Wanaagsanaanta Luuqadda Ingiriisida.